Early ACCESS

Caruurta, bucbucoodka iyo qoysaska

# QAYBTA C IDEA

# Buugga Nidaamka Masuuliyadda Waalidka

# (Xuquuqda Waalideed eeEarlyIntervention)

## Sibteembark2019

Waaxda Waxbarashada Iowa,Waakaladda Ajansiga
Lead ee Istaraatiijiyada Taageerada iyo
WaxbarashadaXafiiska Dhismaha GobalkaGrimes
DesMoines,IA50319

Gobalka Iowa **Waaxda**
**Waxvarasgada** Xafiiska
Dhismaha Gobalka Grimes
400 E. 14th Street
Des Moines, IA  50319-0146

## Gudiga Waxbarashada Gobalka

RosieHussey,President,ClearLake
CharlesC.Edwards,Jr.,VicePresident,DesMoines
DianeCrookham-Johnson,Oskaloosa
SisterJudeFitzpatrick,WestDesMoines
MichaelL. Knedler,CouncilBluffs
ValorieJ.Kruse,SiouxCity
MikeMay,SpiritLake
MaxPhillips,Woodward
LaMettaWynn,Clinton
EdgarThornton,StudentMember,IowaCity

### Maamulka

BradA. Buck,Agaasimaha iyo Madaxa Isku Xidhka ee Gudiga Waxbarashada Gobalka

**Qaybta Waxbarashada iyo Natiijooyinka**
W.DavidTilly,Ku Xigeenka
Agaasinka
MaryDelagardelle,Maamulka Qaybta Xiriirka
ThomasA.Mayes,Qareen

**Wakaalada Waxbarashada Istaraatiijiyada iyo Taageerada**
SarahBrown,Jiifka
LauraBelleSherman-Proehl,Latalin Maamul
CindyWeigel,Lataliye

Siyaasadda Waaxda Waxbarashada ee Iowa waa inaan wax la takoorin iyadoo lagu salaynayo qoomiyad, asal, midab, galmada uu aaminsanyahay, jinsi, bulshada uu kasoo jeedo, lab iyo dhadig kuu yahay, naafonimo, diin, cimri, xisbi siyaasadeed waalid run ah ama mid bacrimin ah, qoys ama xaaladda guur ee barnaamijkiisa, shaqooyin, ama dhaqamo shaqaalaysiin sida ay u baahantahay qaybtaha Xeerka Iowa 216.9iyo256.10(2),CiwaanadaVI iyoVIIee Xeerka Xuquuqda Shibilka ee1964 (42 U.S.C. §2000diyo2000e),Xeerka Sinaan Wax u Bixinta ee1973 (29 U.S.C.§206, et seq.), CiwaankaIX (Wax ka Badalidda Waxbarashada, 20 U.S.C.§§1681–1688),
Qaybta504 (Xeerka Dib u Hagaajinta ee 1973,29 U.S.C. §794),iyo Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah (42 U.S.C. §12101,et seq.). Haddii aad qabto su'aalo ama cabashooyin la xiriira u hogaansanka  siyaasadda Waaxda Waxbarashada Iowa, fadlan la xiriir latalinta sharci ee Waaxda Waxbarashada Iowa, GrimesState Office Building,400 E. 14thStreet,Des Moines, IA50319-0146,lambarka telefoonka: 515-281-5295,ama agaasimaha Xafiiska Xuquuqda Shibilka, Waaxda Waxbarashada Maraykanka, CitigroupCenter,500 W.MadisonStreet,Suite1475,Chicago,IL 60661-4544, lambarka telefoonka: 312-730-1560,lambarka FAKIS: 312-730-1576,lambarka TDD: 877-521-2172,iimayl: OCR.Chicago@ed.gov.

## Tusmada


Horudhac....................................................................................................1

Qeexitaano Muhiim ah.....................................................................................2

Ogalaansho La Ogaysiisay................................................................................3

Ogaysiis Hore oo Qoraal ah..............................................................................4

Ilaalinta Warbixinta/Qoraalada.........................................................................5

Kulamada....................................................................................................9

Waalidka yio Waalid Matalaha.........................................................................10

Xulashooyinka Lagu Xaliyo Khilaafaadka............................................................12

Dhexdhexaadinta...........................................................................................13

Cabashooyinka Gobalka IDEA............................................................................15

Habka Cabashooyinka (Habka Dhagaysiga Dacwadaha)..........................................17

Foomka Moodheelka:Codsiga Shirka Dhexdhexaadintaa..........................................20

Foomka Moodheelka:Cabashada Gobalka IDEA......................................................22

Foomka Moodheelka:Habka Cabashada (Codsiga Habka Dhagaysiga)..........................24

Qorshayaasha Habka Lacag Bixinta....................................................................26

# Horudhac

EarlyACCESSwaa iskaashi u dhexeeya qoysaska iyo caruurtooda qaba baahiyo khaas ah (dhalashada illaa da'da sadex) oo dhinac ah iyo adeeg bixiyayaasha ka socda Waaxaha Waxbarashada Iowa, Caafimaadka Dadwaynaha, iyo adeegyada dadwaynaha iyo Jaamacadda Iowa Fildhiga Caafimaadka Ilmaha. Ujeedada iskaashigan waa in laga wada shaqeeyo sidii loo garan lahaa, la isugu xidhi lahaa, oo loo bixin lahaa adeegyada cawinta hore ee loo baahanyahay iyo mucaawanooyinka qoysaska ka taageeri doona caawinta caruurtooda saqiirada ah si ay u koraan oo u hagaagaan
.

Waalidku waxay leeyihiin xuquuq loo yaqaan hanaanka xanaanaynta, taasoo ku dabakhmaysa dhinac kastoo ah habka caawinta wakhtiga hore, sida qiimayta, galaangal u yeelashada qoraalada, iyo ka qaybqaadashada Kooxda Qorshaha Adeegyada Qoyska (IFSP). Shuruucda iyo xeerka federaalku waxay sharaxaayaan waxa la rabo in laga yeelo caruurta iyo saqiirada u qalanta ee kujira xaaladda garaadka oo daahasi kor loogu qaado koriinkooda iyo garaadkooda.

Dikumintigan wuxuu kaaga dhiganyahay ogaysiiska ama warbixintaada masuuliyadeed, wuxuuna kaa caawinayaa inaad fahanto xuquuqaha aad adiga iyo ilmahaagu ku leedihiin sharciga federaalka, *Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA) Qaybta C, iyo sidoo kale Shuruucda Maamuleed ee Horey u Helidda Adeegyada Caawinta Wakhti Hore.*

Wixii warbixin dheeri ah ee ku saabsan xuquuqahaaga, kala
xidhiidh midkastoo ka mid ah kuwan soo socda:
Iskuduwahaaga Adeegga
Damiinkaaga Gobaleed (Waydii Agaasimaaha Waxbarashada Khaaska ah)
Waaxda Waxbarashada ee Iowa
Haayadda Istaraatiijiyadda iyo Taageerada Ardayga
Dhismaha Xafiiska Gobalka ee Grimes
DesMoines,Iowa50319-0146
515-281-3176

WAYDIIIXarunta Mucaawinada, Xarunta Tbabarka iyo Warbixinta Waalidka ee Iowa
5665GreendaleRoad,SuiteD
Johnston,IA50131
1-800-450-8667
515-243-1713
FAKIS515-243-1902
info@askresource.org
http://www.askresource.org

Xuquuqaha Naafada Iowa
400EastCourtAvenueSuite300
DesMoines,Iowa50309
515-278-2502
515-278-0571(TDD)
800-779-2502
515-278-0539FAX
info@disabilityrightsiowa.org
http://www.disabilityrightsiowa.org

**Goormaan helayaa koobi ka mid ah dikumintiga hanaanka masuuliyadeed/xuquuqaha qoyska?**

Waxaad heli doontaa koobi ka mid ah hanaanka masuuliyadaeed/xuquuqhaa qoyska ugu yaraan hal mar sanadkii, iyo markasotoo aad codsato. Sdioo kale waxaa koobi lagaa siin doonaa markastoo aad hesho ogaysiis qoraal ah oo hore.Foomka ogaysiiska hore ee qoran waxaa ku ooli doona ciwaanka websaydka hanaanka masuuliyadeed.

**Ma waxaa jira mucaawino kale oo warbixineed oo laga heli karo wax kale oo ku saabsan IDEA 2004 Qaybta C, iyo shuruuc iyo xeerar kale oo muhiim ii ah inaan ogaado?**

Kuwan hoos lagu taxay ayaa ah ciwaanada websaydyada intewrnetka ee aad booqan karto:

Shuruucda Maamuleed ee Iowa Early ACCESS
http://www.educateiowa.gov

Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah
http://idea.ed.gov/part-c/search/new

Xeerka Sirta iyo Xuquuqda Waxbarasho ee Qoyska (FERPA)
http://www.ed.gov/policy/gen/guid/fpco/ferpa/index.html

Xeerka Caymiska Caafimaad iyo Xisaabinta (HIPAA)
http://www.hhs.gov/ocr/hipaa/

Ka raadso iskuduwahaaga adeegga wixii mucaawino kale ah.Waxaad ugu noqon kartaa:

*Sida ay Wax u Shaqeeyaan Marka ay Wax Khaldamaan*
*Si Fudud u Samaynta! Sida ay Wax u Shaqeeyaan marka uu joogo Fududeeyaha Xalka*
*Diyaarinta Racfaanka Kahor ama Dhexdhexaadinta*
*Dhexdhexaadinta Waxbarashada Khaaska ah: Tilmaanta Waalidka*

## Qeexitaanno Muhiim ah

**Wakaaladda Dadwaynaha:**Wakaaladda Lead(Waaxda Waxbarashada ee Iowa) iyo qayb hoosaad kasta oo siyaasadeed oo gobalku leeyahay taasoo masuul ka ah kuwaasoo siiya adeegyada caawinta hore ee caruurta u qalanta ee soo hoos galaya shuruucda IDEA iyo Early ACCESS. Waaxda Waxbarashada ee Iowa ayaa masuul ka ah cabashooyinka Early ACCESS/sistamka dacwadda.

**Damaanad Qaadaha/Damiintaha Gobaleed:**qof hela dhaqaalaha faderaalka Qaybta C ama dhaqaalaha Gobaalka oo ay la socoto waajibaad sharci ah oo lagu xaqiijinayo habka Early ACCESS oo loo sameeyo gobal ahaan.

**Adeegyada Caawinta Wakhti Hore:**adeegyada koriinka garaadka ee la bixiyo iyagoo hoos imaanaya kormeerka dadwaynaha; iyagoon wax kharash ah ku kacayn marka laga reebo meelaha ay shuruucda faderaalka iyo kuwa gobalku ay ogalaanayaan hab lacag bixin; ooloogu talgalay in lagu haqab tiro baahiyaha koriinka garaadka ilmaha saqiirka ah ee naafada ahsida ay gartaan kooxda Qorshaha Shakhsiyeed ee Adeegga Qoyska .
Adeegyadu waa mid ama wax ka badan oo qaybaha soo socda ka mid ah: jir ahaan, xiriirka wadahadalka oo adag, bulsho dhexgalka/kacsanaan, ama garaad xumo..

**Ilmo Saqiir ah oo Naafo ah:**qof ka yar da'da 3 sano kaasoo u baahan adeegyada caawinta hore sababtoo ahdaahid garaadka la xiriirta, taas oo lagu cabiray baadhitaan xarun baadhitaankeedu wanaagsanyahay iyo qaababka 1 ama wax ka badan oo meelaha koriinka garaadka la xiriira ah oo ay ku jiraan qoqobnaanta, koriinka jireed, hadalka, bulsha dhexgalka/kacsanaanta ama maskax wareerka; ama sababtoo ah xaalad caafiamaad oo la baaray oo jir ahaan ama maskax ahaan ah taasoo loo badinayo inay keeni karto daah ku yimaadda koriinka garaadka
.

# Ogalaanshah la Ogaysiiyay

**Maxaa "ogalaansho" loola jeedaa?**

Ogalaansho wuxuu dhacaa marka lala yimaado dhamaan sadexdan shuruudood:

1. Marka si buxda laguugu sheegay dhamaan warbixinta ku aaddan ("muhiimka") howlaha ogalaanshahaaga looga baahanyahay oo lagugu ogaysiiyo luuqadda aad u dhalatay.
2. Markaad fahanto oo aad ogalaato, ood qoraal ahaan ku ogalaato, howsha ogalaanshahaaga looga baahanyahay. (foomka ogalaanshuhu waa inuu qeexaa oo uu taxa qoraalada caawnta hore (haddii ay jiraan) ee la fasixi doono iyo cidda loo fasixi doono.)
3. Marka aad fahanto in ogalaansho bixintu ay tahay mid aad iskaa u samaysay oo aad ogalaanshahaaga la laaban karto wkahti kasta.

**Goormaa loo baahanyahay ogalaanshaha waalidka ee la ogaysiisyay?**

Ogalaanshahaaga waxaa loo baahanyahay ka hor:

1. Damaanad Qaadaha Gobaleed ama ama wakaalad kale oo Early ACCESS ay siiso ilmahaaga qaabab baadhitaan oo ikhyaari ah si go'aan looga gaaro in ajanisgu uu u malaynayo in laga yaabo in ilmahaagu uu qabo naafo;
2. Dhamaan qiimaynada iyo baadhitaanada ilmahaaga iyo qoyskaaga;
3. Ilamahaaga iyo qoyskaagu waxaya helaan adeegyada Early ACCESS;
4. Isticmaalka caymisyada dadwaynaha iyokuwa gaaarka loo leeyahay ee wax ka dabaraya ilmahaaga ama qoyskaaga(fiiri bogagga 26 ilaa 35), marka laga reebo inaan ogalaanshahaaga loo baahanayn;iyo
5. Sheegidda ama daah furidda warbixnta ilmahaaga ee shakhsi ahaan loo aqoonsan karo oo laga soo saaro qoaalada ilmahaaga ee Early ACCESS, marka laga reebo inaan ogalaanshahaaga loo baahnayn.

Haddii aad diiddo inaad bixiso ogalaanshahaaga soo hoos galaya qodobada 1, 2, ama 3, Damaanad Qaadaha Gobaleed ama ajansi kale oo Early ACCESS ah waa in ay qaadaan talaabo masuuliyadd leh oo ay ku xaqiijinayaan in aad (a)si buuxda uga warqabto nooca ama dabeecadda qiimaynta, baadhidda, ama adeegyada looheli karo ilmahaaga, iyo (b)inaad fahanto in ilmahaagu uusan awoodi doonin inuu helo qiimayn, baadhitaan ama adeeg ilaa aad ogalaansho bixisid.

Haddii aad oglaaanshahaaga siisid adeegga EarlyACCESS,waa inay bilowdaan sida ugu dhakhsaha badan ee ugu macquulsan kadib markaad bixisid ogalaanshaha.

**Maxaa dhacaya haddii aan ka laabto ogalaanshahayga adeegyada?**

Ogalaanshahaagu waa mid kuu madaxbanaan waxaadna la laaban kartaa wkhati kasta; si kastase ha ahaatee, ma saamaynayo ficil ama tilaabo dhacday kadib marka ogalaanshaha la bixiyay oo kana horeysa ka hor intaan oglaaanshaha lala noqon. Waxaad diidi kartaa ama aad ka laaban kartaa ogalaashahaaga adeeg gaar ah oo cawinta hore ah adoon wax u dhimayn adeegyada kale eeEarlyACCESSee uu ilmahaagu helo.

**Haddii aan diido ogalaanshahayga,Damiinka Gobalkuama ajansi kale oo EarlyACCESSah ma way awoodi doonaan inay isticmalaan habka dacwadda IDEA si ay uga doodaan diidmada aan ku diiday ogalaanshaha?**

Maya.

**Haddii aan la noqdo oglaaanshahagya, ma ku amri karaaDamiinka Gobalkainuu tirtiro qoraalada EarlyACCESS ee ilmahayga?**

Maya.

# Ogaysiis Hore oo Qoraal ah

Ka qaybqaadashadaada go'aanka hormarinta ilmahaagu waa muhiim.Sharciga ayaa u baahan inaad ka qayqaadato maka ay socdaan howlo khaas ah maadama ay tani saamayanayso adegyada horey u cawinta ilmahaaga.

"Ogaysiis Hore oo Qoraal ah"waa qoraal laguugula soo xidhiidhayo oo kaaga imaanaya iskuduwaha adeegaagamarka adeeg bixiye uu soo bandhigayo ama uu diidayo inuu bilaabo ama uu badalayo aqoosniga, qiimaynta ama meelaynta ilmahaaaga ama xeerka ku haboon adeegyadaada EarlyACCESS ee ilmahaaga iyo/ama qoyskaaga.

Ogaysiiskaas wain laguugu siiyo wkahti macquul ah kadib marka go'aanka adeeg bixiyaha ee ku aaddan aqbalaadda ama diidmada la gaaro laakiin kahoreysa inta adeeg bixiyuhu uusan hir galin tilaabadaas.

**Warbixintee kujirta ogaysiiskan?**
Ogyasiiska wainay ku jiraan waxayaalaha soo socoda:

1. qeexitaanka tilaabada la soo jeediyay ama la diiday;
2. sharaxaadda sababta tilaabada loosoo jeediyay ama loo diiday;
3. hanaanka masuuliyadeed ee la heli karo; iyo
4. Sida loo xareeyo cabasho gobal ama habka cabashada (iyo wakhtiyada ku dabakhmaya) markaad aaminsantahay in la jabinayo shuruud EarlyACCESSah.

**Muxuu ogaysiisku u ekaan doonaa?**
Wuxuu noqon doonaa foom ku qoran luuqad ay dadwyanuhu fahmi karaan.Wuxuu ku qoraan doonaa luuqadda aad u dhalatay.Haddii luuqadda aad u dhalatay (ama qaabka kale eed xiriirka ku samayso) aysan ahayn luuqad qoran, iskuduwaha adeega ayaa wuxuu qaadi doonaa tilaabo uu ku xaqiijinayo inaad fahanto ogaysiiska. Haddii aad dhagool ama indhool tahay, ama aadan lahayn luuqad qoran, wada hadalku wuxuu noqon doonaa qaabak aad caadiyan isticmaasho(sida luuqadda tilmaanta, calaamadaha ama wadahadal afka ah).

**Kawaran haddii aanan ogalaan tilaabada la soo jeediyay ama diidmada?**
Waxaa jira qaabab badan oo nidaam ah iyo kuwa aan ahayn oo laguu heli karo.Waxaa lagu sharaxay qayta buug gacmeedka ee "Qaababka Lagu Xaliyo Khilaafaadka".Iskuduwhaaga adeegga ayaa kaa cawin kara inaad fahanto qaababka. Mucaawinooyin kale ayaa waxay ku qoranyihiin qaybta horudhaca ee dhinaca hore ee buuggan.

Haddii aad codsato, iskuduwaha adeegaaga ama ajansiga dadwaynaha ayaa kuu sheegi doona adeegyada sharci ee lacag la'aanta ah iyo kuwa kharashka yar iyo adeegyada kale eeku caawin kara ee ka jira deegaankaaga.

**XUSUUSIN:**

# ILAALINTA WARBIXINTA/QORAALADA

IDEAsharci kale oo federaalku leeyahay  oo la dhaho Xeerka Xuquuqaha Waxbarasho ee Sirta Qoyska (FERPA)wuxuu ku siinayaa dhowr xuquuqood oo ku saabsan qoraalada EarlyACCESSee ilmahaagawaxaad xaq u leedahay inaad galaangal u yeelato qoraaladaas waxaadna xaq uleedahay inaad ka dooddo waxyaabaha aad umalayso inaysan saxsanayn ee qoraalada kujira. Warbixinta shakhsi ahaan loo aqoonsan karo ee ilmahaaga waa sir, waana inaan la soo saarin ogalaanshahaaga la'aantiisa (ilaa ay ku dhacdo waxyaabaha laga soo reebayo ogalaanshaha).Qaybtan waxay bixinaysaa warbixin dheeri ah oo ku saabsan ilaalinta muhiimka ah.

### Galaangal ma u yeelan karaa qoraalada EarlyACCESSee ilmahayga?

Haa.Ajansi dadwayne waa in uu kuu ogalaadaa inaad baadhho oo aad dib u eegis ku samayso qoraalada caawinta wakhti hore ee ilmahaagaee la xiriira qiimaynta iyo baadhitaanada , go'ansashada u qalmitaanka, hormarka iyo taabbagalinta IFSP, cabashooyinka shakhsiyeed ee xiriirka la leh ilmahaaga, iyo dhinac kasta oo kale oo ku lug leh qoraalada ku saabsan ilmahaaga iyo qoyskaaga. Ajansiga dadwaynuhu waa inay ku siiyaan, iyagoo ku salaynaya codsigaaga, liistada noocyada iy goobaha laga soo aruuriyo, lagu hayo, ama ay ku isticmaasho ajansigu .

### Goorma ayay ajansiga dadwaynuhu ay ii oglaaan doonaan inaan galaangal u yeesho qoraalaadaEarlyACCESSee ilmahayga?

Ajansiga dadwaynuhu wuxuu ogalaan doonaa marka la codsado in dib loo eego ama la baadho qoraalada ayadoon la daahinayn–ma aha in ay ka badato 45 bari o maalmaha kaladharka ah  kadib marka la codsaday iyo ka hor inta aan la qaban wax kulan oo la xiriira IFSP ama wax dhagaysi ah.

### Maxaa ku jira "xaqqa baadhitaanka iyo dib u eegista"?

Xaqqa baadhitaanka iyo dib u eegista waxaa ku jira waxyaalaha soo socda:

1. Jawaab ka imaanaysa ajansiga ka qaybgalaya oo laga bixinayo codsiyada macquulka ah oo laga  bixinayo sharaxaado iyo tujumoista qoraalada;
2. Codsiga ah in ajansigu biixiyo koobi k maid ah  qoraalada warbixinta (haddii lagu guuldaraysto in la bixiyo koobiyada waxay si wayn kaaga hor istaagaysaa xaqqa aad u leedhaya inaad baadho oo aad dib u eegto qoraalada); iyo
3. In wakiilkaagu uu kuu baadho oo uu dib u eegis kuugu sameeyo qoraalada.

Ajansigu waxay kuu ogahashay inaad awood u leedahay inaad baadho oo aad dib u eegto qoraalada ilmahaaga ilaa ajansiga loo sheego inaadan awood u lahayn  taasoo hoos imaanaysa sharciga Gobalka ee xukumaya arimaha noocaas ah sida masuuliyadda, kala maqnaanshaha, ama furitaanka.

#### Ajansigu qoraal ma ka reebi doontaa qofka arka qoraalada ilmahayga ee Caawinta Wakhti Hore?

Haa.Marka laga reebo aragtida waalidka ama shaqalaha ajanisga ee loo ogalaaday, ajansiga qoraalada samaynaya wuxuu qoraal ka reebidoonaa  dhinacyada galaangalka u yeelanaya qoraalada caawinta wakhtiga hore, oo ay kujiraan:

1. Magaca qofka;
2. Taariikhda galaangalka la ogalaaday; iyo
3. Ujeedada qofka loogu ogalaaday isticmaalka qoraalada.

#### Maxaa dhacaya haddii qoraalka ay ku jiraan warbixinta wax ka  badan hal ilmo?

Waxad xaq u leedahay inaad baadho oo aad dib u eegto kaliya warbixinta ilmahaaga la xiriirta ama in laguu sheego warbixintaas khaaska ah.

**Ajansigu ma wax lacag ah buu iiga qaadayaa markaan baadhayo ama dib u eegayo qoraalada EarlyACCESS ee ilmahayga?**
Ajansiga ka qaybqaadanaya wuxuu lacag ku dallici doonaa koobiyada qoraalada laguu sameeyay haddii lacagtaas aysan si wayn kaaga hor istaagayn isticmaalidda xaqqaaga aad ku baadhaysid oo aad dib ugu eegaysid qoraaladaas. Ajansigu lacag kaagama qaadi karo raadinta iyo soo saaridda warbixinta.

**Ma waxaa jira qoraallo ay tahay in lacag la'aan lagugu siiyo?**
Haa.Ajanisiga EarlyACCESSwaa inuu ku siiyaa koobiga qiimayn kasta, baadhitaanka ilmaha, baadhitaanka qoyska, ama Qorshaha Adeegyada Shakhsiyadeed ee qoyska (IFSP)sida ugu dhakhsaha badan ee uguna macquulsan kadib kulan kasta ee IFSP.

**Kawaran haddey ila noqoto in warbixinta qoraalka kujirta aysan saxsanayn?**
Haddii aad aaminsantahay in warbixinta la soo aruuriyay, la hayo ama la isticmaalay aysan saxsanayn, wax khaldayso ama ay jabinayso sirta ama xuuqaha kale ee ilmaha, waxaad waydiisan kartaa ajansiga qoraalka haya in ay wax ka badasho qoraalka.Ajansigu wuxuu ku go'aansan doonaa wakhti macquul ah in warbxinta wax looga badlao sida la codsaday iyo inkale. Haddii uu ajansigu go'aansado inuu diido inuu wax kabadlo warbixinta sida la codsaday, wuxuu kugu wargalin doonaa diidmada wuxuuna kuu sheegi doonaa xaqqa aad u leedahay dhagaysiga.

Makraad codsato, ajansigu wuxuu fursad kuu siin doonaa dhagaysi aad kaga dooddo warbixnta qoraalka caawinta wakhti hore si loo xaqiijiyo inaysan saxsanayn, ay wax khaldayso, ama si kale haddii loo dhaho jabinaysa xuquuqaha kale ee sirta ilmahaaga. Iyadoo ah natiijo ka dhalata dhagaysiga:

1. Haddii go'aanku yahay mid warbixntu ay wax khaldaysomid khaldan ama haddii kale jabinaysa sirta xuaquuaha kale ee ilmahaaga, ajansigu waa inuu warbixinta wax uga badalaa sida la rabo waana in qoraal ahaan lagugu wargaliyo.
2. Haddii go'aanku yahay inaysan wabrinxtu saxsanayn, wax khaldayso, ama haddii kale ay jabinayso xuquuqaha kale ee ilmahaaga , ajansigu wuxuu kuu sheegi doonaa go'aanka. Ajansigu wuxuu sidoo kale kuu sheegi doonaa xaqqa aad u leedahay in la qaroup qoraalada laga hayo ilmahaaga ee kafaaloonaya warbixinta oo caddeynaya sababaha aad ku khilaafsantahay go'aanka ajansiga.
3. Wixii sharaxaad ah ee la galiyo qoraalka ilmahaaga waa in ajansigu u haystaa in ay qayb ka yihiin qoraaladaada marka laga reebo qoraalka ama qaybta doodda laga keenay waxaana haynaya ajansiga. Haddii qoraalka ama qaybta doodda laga keenay ee qoraalka uu ajansigu tuso cid un, sharaxaadaada waa in sidoo kale la tuso.

**Dhagaysigu muxuu noqon karaa?**
Dhagaysigu waa in uu waafaqaa shuruudaha FERPA.Shuruudahaas waxaa laga helaa 34C.F.R.Qaybta99.22.La xiriir iskuduwaha adeegaaga haddiii aad rabi lahayd warbixin ku saabsan shuruudahaas.

**Maxaa laga wadaa warbixinta shakhsi ahaan loo aqoonsan karo?**
Shakhsi ahaan looo aqoonsan karo waxaa weeye warbixinta ku ay ku jirto, laakiin aan ku koobnayn:

- Magaca ilmahaaga
- Magacaga amamagacyada kale ee xubnaha qoyska
- Ciwaanka ilmahaaga ama ciwaanka xubin kale oo qoyska ah
- Wax qof lagu aqoonsado, sida lambarka sooshal skauuradka ilmahaaga, lambarka ardayga, ama qoraalka isdhalka waalidka iyo ilmaha
- Waxyaalaha kale ee aan tooska ahayn ee wax lagu aqoonsado, sida taariikhda dhalashada ilmahaaga, meesha uu ilmahaagu ku dhashay, ama magaca hooyada ilmaha
- Warbixin kale taasooo, kaligeed ama yadoo wax kale lagu daray, lala xiriirayo ama lala xiriirin karo ilmo khaas ah taasoo u ogalaanaysa qof macquul ah oo bulshada ka mid ah, kaasoon cilmi shakhsiyeed u lahayn xaaladaha, uu aqoonsado ilmo iyadoo ay jirto xaqiiqsasho macquul ah
- Inwarbixin uu codsaday qof  kaas ah oo uu ajansigu si macquul ahaan ah u aaminsanyahay inuu yaqaano aqoonsiga ilmaha kaas oo uu qoraalku la xiriiro.

**Ajansiga gacanta ku haya qoraalada EarlyACCESSee illmahayga ma u baahanyahay inuu ogalaansho I waydiisto si loogu sii daayo warbixinta?**
Haa,sharci ahaan.Ogalaansho waalid waa in la helaa ka hor intaan cidna la tusin (wixii aan ka ahayn saraakiisha, wakiilada loo ogalaaday, ama shaqaalaha ka qayb qaadanaya warbixnta aruurinteeda, haynteeda, ama isticmaalkeeda) warbixinta wax lagu aqoqonsan karo ama aan ka ahayn wixii loo isticmaalayo ujeeddo ka baxsan hirgalinta adeegyada EarlyACCESS.

Sikastase ha ahaatee, waxaa jira waxyaalo laga soo reebayo ogalaanshaha waalidka. Tusaale ahaan, dadka ka shaqeeya waxbarashada waxay macluumaadka waxbrashada tusi karaan iyadoo aysan jirin ogalaansho hore marka ay muhiim tahay in laga jawaabo arin caafimaad oo amarjansi ah. Haddii aad qabto wax su’aalo ah oo ku saabsan waxyaalaha laga soo reebayo FERPA, fadlan la xiriir iskuduwaha adeegaaga.

Hal wax oo muhiim ah oo laga soo reebayo FERPA wuxuu u ogalaanayaa ajansiyada waxbarashada inay maclumaadka u gudbiyaan  ajansi kale oo waxbarasho oo ilmuhu ka diiwaangashanyahay  iyadoo uusan jirin ogalaansho waalid. Sababtaas darteed, iyo in la xaqiijiyo in si toos ah uu u dhaco kala wareejinta laga wareejinayo EarlyACCESSoo loo wareejinayo IDEAQaybtaB(waxbarashada khaaska ah ee caruurnimada hore), haddii ilmahaaga loo wareejiyo Qaybta B ee adeegyada iskuulka ka horeeya isagoo jira da’da sadex, ogalanshahaaga loogama baahnaFERPAiyoIDEA. Macluumaadka EarlyACCESS ee ilmahaaga waxaaloo diri doonaa Ajansiga Waxbarashada Deegaanka ee masuulka ka ah adeegyada waxbarashada khaaska ah ee iskuulka dagmadaada.

Marka ay warbixini qayb ka tahay macluumaadka EarlyACCESSwaxay noqonaysaa mid ay ilaaliso FERPAwaxaana kaliya oo lagu fasixi karaa sida ay qabaan xeerarka FERPA.Tan waxaa ku jira wixii warbixin caafimaad ah ama qiimayn banaanka ah oo ku jirta macluumaadka ilmahaaga.

**Haddii aan diido inaan bixiyo ogalaanshahyga marka la rabo in warbixin laga fiiiriyo qoraalada EarlyACCESSee ilmahayga, muxuu ajansigu samayn doonaa?**
Ajansigu wuu kula kulmi doonaa wuxuuna kuu sharixi doonaa sida diidmadaadu ay u samaynayso helitaanka adeegyada EarlyACCESS ee ilmahaaga.Ajansiga dadwaynuhu kama boodi karo diidmadaada ogalaanshaha.

**Ma waxaa jira talaabooyin kale oo uu ajansiga dadwaynuhu qaadi karo si uu u ilaaliyo oo u waaridiyeeyo sirta warbixinta ilmahayga?**

1. Hal qof o ka tirsan ajansikasta ayaa qaadaya masuuliyadda lagu xaqiijinayo ilaalinta warbixinta shakhsi ahaan loo aqoonsan karo;
2. Dhaman dadka aruurinaya ama isticmaalaya warbixinta shakhsi ahaan loo aqoonsan karo wa ainay helaan tababarka sir qarinta ama tilmaamaha qarinta sirta iyo macluumaadka gaarka loo leeyahay; iyo
3. Ajansi kasat oo howsha ka qaybqaadanaysa waa inay dadwaynaha u haysaa baadhitaanka iyo liistada magacayada iyo boosaska shaqada eeshaqaalaha ajansiga ka tirsan ee galaangalka u leh warbixinta shahkhsi ahaanloo aqoonsankaro.

**Maxaa ku dhacaya macluumaadka EarlyACCESSee ilmahayga marka aan loo sii baahanayn?**Ajansiga dadwaynuhu wuxuu kuu sheegi doonaa marka wabrixnta shakhsi ahaan loo aqoonsan karo ee lasoo ruuriyayay, lahayo, ama la isticmaalay aan loo sii baahanayn in lagu bixiyo adeegyada caawinta wakhti hore ee ilmahaaga. Warbixinta waa in la tirtiro markaad codsato haddii aan macluumaadka mar danbe loo sii baahnayn.

Go’aanka ah inaan warbixntaloo sii baahnayan waxaa gaaristiisa iska leh ajansiga dadwaynaha. Qoraalka waxaa la hayn doonaa ilaa inta uu ka noqonayo mid aan looga baahnayn bixinta adeegydaaEarlyACCESSoo looga baahnayn ujeedooyin hanti dhowrid ama xisaabin. Ugu yaraan ujeedada hantibaadhista iyo xisaabinta waa in loohasytaa shan sano oo ka danbaysa howsha EarlyACCESSama maalgalin kale loogu isticmaalaa.

**Ma waxaa jira qaar ka mid ah macluumaadka oo aysan ajansiga EarlyACCESSaysan baabi’inayn?**

Haa.Ajansigu wuxuu si joogta ah u haysan karaa macluumadka ilmahaaga magaciisa, taariikhda dhalashadiisa, macluumaadka meesha waalidka lagala xiriirayo (oo ay kujiraan magaca iyo telfoon lambarku), magacyada iskuduwayaasha adeegga iyo adeeg bixiyayaasha EarlyACCESS,iyo xogta ka bixitaankiisa (oo ay ku jiraan sanadka iyo da’da uujiro marka laga saarayo iyo wixii barnamijiyo ah ee uu galay wakhtiga ka bixitaankiisa ). Warbixintan waxaa la haynayaa iyadoon lahayn wakhti xadidan.
.

**XASUUSIN:**

# KULAMAD
# A

Kulamada waxaa ilmahaaga loogu sameeyaa go'aamo badan oo muhiim ah.Qaybtani waxay kuu sheegaysaa waxa ay yihiin xuquuqahaaga kulamada.

**Goorma ayay kulamadu yihiin laasim ama ikhyaari?**
Laasim:Shuruucda EarlyACCESSiyo sharciga Qaybta C ee IDEAwaxay u baahanayihiin kulan lagu samaynayo IFSPda bilowga ah haddii la go'aansado in ilmahaagu u qalmo EarlyACCESS,kulan sanadle ah oo lagu qiimaynayo (dib loogu eegayo, sida muhiimka ah) ilmahaaga IFSPdiisa.Sharcigu wuxuu sidoo kale u baahanyahay in kulan la qabto marka ilamahaaga laga wareejinayo EarlyACCESS.
Ikhyaari:sharcigu wuxuu u baahanyahay in IFSPda ilmahaaga si wakhtiyaysan dib u eegis loogu sameeyo (ugu yaraan lixdii bilood ee kasta). Dib u eegistaas wakhtiyaysan waxay noqon kartaa mid kulan lagu sameeyo, laakiin kulankaas laasim maaha. Kooxda IFSPda ilmahaagu waxay sidooo kale go'aansan karaan inay kulmaan haddii ay u arkaan in kulkanku mhiim u yhaay ilmahaaga.

**Maxay yihiin shuruudaha goobta iyo marka uu kulanku dhacayo?**
Kulanka EarlyACCESSwaa in lagu qabtaa:
- Wakhti la dajiyay oo ku haboon adiga; iyo
- In lagu qabto luuqadda hooyo ee bulshada qoyskaaga ama nooc kale oo lagu wada hadlo oo aad isticmaasho, ilaa ay si buuxda u cadaato inaysan macquul ahayn in saas la sameeyo.

.

Waa inaad qayb ka noqtaa diyaarinta kulan kasta. Adiga iy ka qaybgalayaasha kale wa in qoraal ahan la idinku soo ogaysiiyaa wakhti fiican oo ka horeeya taariikhda kulnaka si loo xaqiijiyo in aad kasoo qaybgashaan.

**Yay waajib tahay inuu yimaddo kulamada IFSP?**
Kulamada hore iyo kuwa sanadlayaasha ah ee IFSP, iyo sidoo kale kulmada loogu diyaarinayo qorshe wareejineedilmahaaga, waa in ay ku jiraan ka qaybgalayaasha soo socda:

1. **Adiga!**("waalidka ama waalidinta ilmaha");
2. Xubno kale oo qoyska ah, haddii uu waalidku codsado, haddii macquul loo arko in saas la yeelo;
3. Wakiil ama qof ka baxsan qoyska, hadii u waalidku codsado in qofkaasi ka qaybgalo;
4. Iskudwuhaa adeegga ee masuulka ka ah hirgalinta;
5. Qof ama dad si toos ah ugu lug leh samaynta qiimayta baadhitaanka ilmahaaga iyo qoyskaaga;iyo
6. Haddii ay haboontahay, dadka adeegyada EarlyACCESSsiinaya ilmahaaga ama qoyskaaga.

Haddii qofka lagu sheegay qodabka 5 uu awoodi waayo inuu yimaado, Damiinka Gobalkaayaa wuxuu diyaarinayaa qaab uu ku xaqijinayo in qofkaas uga qaybgalo qaabab kale, oo ay ku jiraan qaar ka mid ah kuwan soo socda: inuu kaga qaybgalo telfoon ahaan, inuu u diro wakaiil cilmo leh oo la ogalaaday, ama inuu sameeyo qoraalo u dhigma oo la geeyo kulanka.

# WAALIDKA IYO WAKIILKA WAALIDKA

Waalidku wuxuu qayb muhiim ah ka yahay adeegyada.Waa muhiim in la ogaado cidda ay yihiin waalidka ilmaha saqiirka ah. Xeerarka IDEAiyoEarlyACCESSayaa qeexa "waalidka."

## Waa kuma waalidku?

"Waalid"waxaa loola jeedaa:

1. Waalidka dhalay ama soo korsaday ilmaha;
2. Waalidka xanaanada, ilaa xeerarka gobalku, haayadaha awoodda u leh ee gobalka ama deegaanku ay ka mamnuucaan in waalidka xanaanadu uu waalid uu noqdo mid waalidka matalo;
3. Masuul guud ahaan loo ogalaaday inuu noqdo waalidka ilmaha, ama loo ogalaaday inuu gaaro go'aamada caawinta wakhtiga hore, kuwa waxbarashada, caafimaadka ama kuwa koriinka ilmaha (laakiin ma aha xaaladda uu ilmuhu ku jiro xarun dowladeed);
4. Qof matalaya booska waalidka ilmaha dhalay ama kan soo korsaday (oo ay ku jiraan awoowyaalkii iyo ayeeyooyinka, aayada ama adeerka hooyada qaba, ama qaraabo kale) kuwaas oo ilmuhu la noolyahay, ama qof sharci ahaan masuul uga ah mucaawinada ilmaha; ama
5. Wakiilka waalidka kaasoo loo magacowday sida uu qabo sharciga faderaalka iyo shuruucda EarlyACCESS.

**Maxaa dhaca marka wax ka badan hal qof uu kasoo baxo qeexitaanka waalid?**

Waa in shuruucda soo socta la isticmaalaa si loo go'aansado in qofku u qalmo "waalid" iyo inkale.

1. Marka laga reebo arinta lagu sheegayo qodobka kan xiga, waalidka ilmaha dhalay ama soo korsaday, marka uu isku dayayo inuu matalo waalidka marka la joogo cutubkan iyo marka wax ka badan hal qof ay u qalmaan inay matalaan waalid, waa in loo aqoonsadaa inay noqdaan waalidka ilaa walidka dhalay ama kan soo korsaday aysan ka haysan awood sharci oo ay ku gaaraan go'aamada waxbarasho ama adeegyda caawinta hore ee ilmaha.
2. haddii dikreeto maxkamadeed ama amar uu sheego in qof khaas ah ama dad ay matalayaan inay noqdaan "waalidka" ilmaha ama inay gaaraan gomaadaa adeegyada caawinta wakhti hore iyagoo wakiil ka ah ilmaha ( marka laga reebo wakiilka waalidka), markaas qofka ama dadka waa in loo aqonsadaa inay noqdaan "waalidka" iyadoo la raacayo ujeedooyinka Qaybta C ee Xeerka, marka laga reebo haddii bixiyaha EIS ee ajansiga dadwaynaha uu siiyo wax adeeg ah ilmaha ama xubin ka mid ah qoyska ilmaha, markaas bixiyaha EIS ama ajansigaas dadwaynuhu ma matali karo inuu noqdo waalidka ilmaha.

**Maxaa loogu baahanayahay wakiil waalid ?**

Damiinka Gobalkuwuxuu u baahanyahay in ilmo kasta uu waalid leeyahay si uu uga qaybqaato hanaanka EarlyACCESS.Haddii ay jiraan mid un ka mid ah shuruudahan soo socda ,Damiinka Gobalku wuxuu go'aansanayaa in wakiilka waalidku uu muhiim u yahay ilmaha:

1. Hadii uusan jjrin wax waalid ah oo la ogyahay;
2. Kadib marka la sameeyo dadaalo macquul ah, haddii la waayo wax waalid ah oo la meelayn kara; ama
3. Haddii ilmuhu ku jiro xarun Gobalku leeyahay oo qaadiguna uu arko kiiska ilmaha; ama uu si kale ugu magacaabo ilmaha wakiil waalid..

Waa masuuliyadda Damiinka Gobalkainuu go'aansado caruurta u baahan wakiil waalid iyo inuu ilmaha u magacaabo wakiil waalid.

**Maxay yihiin waxyaalaha loogu qalmayo in la noqdo wakiil waalid?**
Waakiil walaid waa:

1. Inuusan lahayn dan shakhsiyeed ama mid xirfadeed taasoo ka hor imaanaysa danta ilmaha;
2. Inuu leeyahay cilmi iyo xirfad ku filan taasoo xaqiijinaysa wakiilnimo buuxda oo ilmuhu leeyahay; iyo
3. Inuusan shaqaale ka ahayn Waaxda Waxbarashada ee Iowa, Deeqda Gobalka,amaajansi kasta oo kale kaas oo ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ilmaha.

Teeda kale qofka u qalma inuu noqdo wakiil waaldi looguma tixgaliyo inuu yahay shaqaalaha ajasniga kaliya iyadoo ay sababtu tahay in isaga ama iyada uu ajansigu lacag ku siiyo inay yihiin wakiillo waalid.

**Yaa magacaaba wakiilka waalid?**
Damiinka Gobalkaayaa u magacaabi kara waalid matale cid kasta oo uu sharcigu ogalyahay. Sidookale, maxakmadda gacanta ku haysa kiis danbiyeedka ilmo ku jiro "goob dowladeed" (xarun lagu xanaaneeyo, ama meel lagu hayo oo dadwayne oo ilmaha mucaawino lagu siiyo) ayaa sidoo kale waalid matale u magacaabikara ilmaaha. Wakiilka waalidka ee ay maxkamaddu magacowdo waa inuu kaso baxaa sadexda arimood ee kor lagu soo sheegay.

**Maxay yihiin masuuliyadaha wakiilka waalidka?**
Wakiilka walaidku wuxuu ilmaha u matali doonaa dhamaan arimaha la xiriira qiimaynta iyo baadhitaanada ilmaha, hormarkiisa iyo taabbagalinta IFSP (oo ay kujiraan qiimaynta sanadlaha ah iyodib u eegis xiliyeedka), shaqada hadda socota ee adeegyada caawinta wakhti hore, iyo wixii xuquuqo kale ah ee hoos imaanaya EarlyACCESSiyoIDEA.

**XUSUUSIN:**

## QAABABKA LAGUXALIYOKhILAAFAADKA

Waxaa jira sadex qaab oo ah shuruucda EarlyACCESSiyoQaybta C ee IDEA oo wax lagu xaliyo khilaafaadka .qaababkaas waa:

- dhexdhexaadin ,
- cabashada gobalka, iyo
- cabashada hanaanka taagaan.

Qaababkan waxaa lagu sharixi doonaa qaybaha xiga ee buuggan.

Marka laga sootago sadexdan qaab, Damiinka Gobalkawuxuu leeyahay hab la dhaho Fududaynta Xalka kaas oo aad isticmaali karto.Fududaynta Xalka waa hab lagu xaliyo khilaafaadka, meeshii laga isticmaali lahaa sadexdii qaab dacwadeed ee lagu soo qeexay buuggan. Fududeeye Xal ayaa wuxuu caawinayaa xalinta khilaafaadka ee adeegyada EarlyACCESSiyo arimaha u dhexeeya waalidka, ajansiyada dadwaynaha, iyo adeeg bixiyayaasha qaybaha gaarka loo leeyahay.

Haddii uu farqi yimaado, dood furan ayaa ah tilaabada koobaad ee macquulka ah ee lagu xalinayo khilaafyadaas.Qof sadexaad ayaa wuxuu bixin karaa dib u eegis macquul ah oo lagu samaynayo waxa ay labada dhinac sheeganayaan si loo gaaro xal lagu guulaysto.Fududdeeyaha xalka wuxuu u tababaranyahay dhexdhexaadinta waana dhinaca sadexaad ee macquulka ah. Fududeeyaha Xalku wuxuunoqon karaa qof caadi ah oo ka socda Goablkaaga Early ACCESSama, haddii ay muhiim tahay, qof ka yimid gobal kale ama qof ay keentay Waaxda Waxbarashadu. Adeegga Fududeeyaha Xalka waxaa la bixiyaa isagoon wax lacag ah kuugu kacayn adiga ama adeeg bixiyayaasha ilmahaaga.
.

Muhiim ma aha in la isticmaalo HABKA Fdudueeyaha Xalka kahor inta aan la isticmaalin sadexda hab ee rasmiga ah ee lagu qeexay Buuggan.

**XASUUSIN:**

**DHEXDHEXAA**
**DINTA**

Waaxda Waxbarashada iyo Wakiilada Gobalkuwaxay leeyihiin qaabab ay dhinacyadu ku xalin karaan khailaafaadka iyagoo maraya dhexdhexaadinta. Dhexdhexaadintu waxay tabarucaad u tahay dhinacyada oo dhan waxaana dhexdhexaadinta samaynaya dhexdhexaadiye cadaalad ah kaasoo u tababaran farsamooyin wax ku ool ah oo dhexdhexaadinta la xiriira. Dhexdhexaadintu waxay dhici kartaa wakhti kasta, xitaaka hor intaadan buuxin habka cabashda taagan.Dhexdhexaadinta looma isticmaaalayo in lau daahiyo ama lagu diido xaqqa aad u leedahay inaad ku xarayso cabshada taagan, ama in laguugu diido xuquuqaha kale ee aad leedhaay ee hoos imaanaya EarlyACCESS.

Foomka moodheelka ee lagu codsanayo dhexdhexadinta wuxuuku yaallaa bogga 20 ee buuggan.

**Xageen kaheli karaa dadka dhexdhexaadiyayaasha ah yaase bixinaya lacagta dhexdhexaadinta?**
Waaxda Waxaabrashada Iowa:

1. Waxay haysaa liistada dadka u qalma inay noqdaan dhexdhexadiyayaal cilmi u leh shuruucda iyo xeerarka la xiriira xeerka adeegyada EarlyACCESS;
2. Waxay ku dooratan dhexdhexaadiyayaasha qaab nasiib ah, ama u qalmitaan ama qaab kale oo cadaalad ah; iyo
3. Waxay bixisaa kharashka habka dhexdhexaadinta, oo ay ku jiraan kharshaadka kulamada si loo dhiirgaliyo dhexdhexaadinta marka uu dhinac doorto inuusan isticmaalin dhexdhexaadnta.

**Sideen ku ogaanayaa in dhexdhexaadiyuhu uu cadaalad yahay?**
Qofka noqonaya dhexdhexaadiye:

- Ma noqon koro shaqaale ka tirsan Waaxda Waxbarashada Iowaama daeeg bixiye ajansi dadwayne ama adeeg bixiye gaar loo leeyahay oo adeegyo toos ah siinaya ilmahaaga; iyo
- Waana inuusan lahayn dan shakhsiyeed iyo mid xirfadeed oo ka hor imaanaysa danta ilmaha;

Teeda kale qofka u qalma ma aha shaqalahaa Waaxda Waxbarashada ee Iowa maxaa yeelay isaga ama iyada waxaa lacag lagu siyaa inuu yahay dhexdhexaadiye.

**Maxay yihiin waxyaalaha aan u baahanahay inaan ka ogaado habka dhexdhexaadinta?**

1. Qayb kastoo ka mid ah dhexdhexaadinta waa in loo jadwaleeyaa si wakhtiyaysan waana in lagu qabtaa meel u haboon dhinacyada uu muranku ka dhexeeyo.
2. Haddii adinka iyo ajansiga dadwaynuhu aad khilaafka ku xalisaan habka dhexdhexaadinta, adinka iyo ajansiga dadwaynuhu wa inaad isla samaysaan heshiis sharci ahaan loogu hogaansamayo.
3. Adiga iyo wakiilka ajansiga dadwaynaha ee leh awoodda uu kula tacaamulo ajansiyada noocaas ah waa inuusixiixaa heshiiska sharci ahaan loogu hogaansamaayo.
4. Heshiis dhexdhexaadin, oo qoran oo sixiixan waxaa hirgalinaysa maxakmad kasta oo Gobal oo leh qaab xukun macquul ah ama maxkamad dagmo oo Maraykanka ah.
5. Doodaha dhaca inta lagu jiro dhexdhexaadinta waa kuwo sir ahaan loo ilaalinayo loomana isticmaali karo caddeyn ahaan marka la qaadayo dhagaysiga dacwadda taagan ama dacwad madani ah oo maxkamad kasta oo faderaal ama gobal.

**Kawaran haddii aanan rabin inaan isticmaalo habka dhexdhexaadinta?**
Wakiilada Gobalku waxaykuusoo bandhigi kartaa kuwa aan isticmaalayn habka dhexdhexaadinta fursadda ay kula kulmaan dhinaca aan danaynayn wakhti iyo meel ku haboon waalidka.

**Yaa weeye dhinaca aan danaynayn?**

1. Cid kale oo ku haboon khilaaf xallinta;
2. Xarunta Tababarka iyo Warbixinta ee Iowa(marka la joogoIowa,tani waa u Galaangal yeelashada Caruur Khaas ah ah);ama
3. Xarun mucaawano waalid.

**Muxuu smaayn doonaa dhinaca aan xiisaynayn?**
Dhinaca aan xiisaynayn wuxuu sharixi donaa faa'iidooyinka, wuxuuna kugu dhiiragalindoonaa isticmaalka habka dhexdhexaadinta.

**Inta uu taaganyahay codsigayga dhexdhexaadintu, adeeggee buu ilmahaygu helayaa?**Inta codsi kasta oo dhexdhexaadineed uu taaganyahay oo ka danbaysa toban bari wakhtiga lagalay shirka dhexdhexaadinta oo aan wax heshiis ah la gaarin, ilaa ay ajansiga iyo waalidka ilmuhu isla ogalaadaan wax kale mooyaane, ilmaha ku lug leh dhexdhexaadinta noocaas ah waa inuu helaa adeegyada horey u caawinta ee lagu sheegay IFSP ee uu waalidku ogalaaday.

Haddii dhexdhexaadintu ay ku lug leedahay codsiga adeegyada bilowga ah ee soo hoos galaya EarlyACCESS,ilmuhu waa inuu helaa adeegyaddaas uusan muranku ka jirin.

**XASUUSIN:**

# CABASHADAGOBALKA EE
# IDEA

Sharcigu wuxuu u baahanyahay Waaxda Waxbarashada ee Iowa inay leedahay nidaam lagu baaro cabashooyinka uu ajansi ku jabiyay Qaybta C ee IDEA ama shuruucda Early ACCES ee Iowa. Foomka moodheelka ee lagu xareeyo cabashooyinka gobalka wuxuu ku yaalla bogga 22 ee buuggan.

**Waaxda Waxbarashada ee Iowa ma leedahay nidaam lagu xareeyo cabasho gobal oo hoos imanaysa Early ACCES?**

Waaxda Waxbarashada ee Iowa waxay leedahay nidaam qoran oo loogu talaglay:

1. Xalinta cabahso kasta, oo ay ku jiraan cabashada ay xareeyaan urur ama qof ka yimid gobal kale, iyagoo siinaya qaabka uu uga xiraynayo cabashada Waaxda Waxbarashada Iowa, iyo
2. In si wayn loogu faafiyo nidaamyada Gobalka waalidka iyo dadka kale ee danaynaya kuwaas oo ay ku jiraan xarumaha tababarka iyo warbixjnta waalidka, ajansiyada difaaca iyo qareenada, xarumaha sida madaxabanaan loogu noolyahay, iyo meelo kale oo haboon

**Maxay samayn doontaa Waaxda Waxbarashada Iowa haddii ayogaato in lagu guul daraystay bixinta adeegyada EarlyACCESS?**

Xalinta cabashooyinka ay Waaxda Waxbarashada Iowa ogaatay in lgu guuldaraystay bixinta adeegyo haboon, goblaku waa inuu ka hadlaa:

1. In lagu guuldaraystay in la bixiyo adeegyohaboon, oo ay ku jiraan tilaabo haboon oo lagu saxayo si looga hadlo baahiyaha ilmaha, iyo
2. Adeegyo kale oo haboon oo mustaqbalka la siinayo caruurta naafada ah.

**Maxaa ku jira nidaamka cabashada gobalka ee Waaxda Waxbarashada Iowa?**

Nidamkeeda cabashada, Waaxda Waxbarashada Iowa waxaa ku jira xadidaad wakhti oo ah 60 bari oo ka danbaysa markacabashada la xareeyo si:

1. loosameeyo baadhis madaxbanaan oo lagu sameeyo goobta, haddii Waaxda Waxbarashada Iowa ay go'aansato in baadhitaanku uu muhiimyahay;
2. Loo siiyo qofka cabanaya fursad uu kusoo gudbiyo warbixin dheeri ah, hadal ahaan ama qoraal ahaan, taasoo ku saabsan sheegashooyinka cabashada;
3. Loo siiyo ajansiga adadwayanaha fursad uu uga jawaabo cabashada, oo ay ku jiraaan, ugu yaraan:
   a. caddeynta ajansiga dadwayanaha, qorshe lagu xalinayo cabashada iyo
   b. ogalaanshaha waalidka, fursad uu ajansiga dadwayanuhu ugu qalqaaliyo waalidka dhexdhexaadinta, ama qaab kale oo xalinta khilafka ah;
4. Dib loogu eego dhamaan warbixnta la xiriirta iyo in laga sameeyo go'an madaxbanaan in ajansiga dadwyanaha uu jabinayo shuruudaha IDEA; iyo
5. Loo soo saaro go'aan qoraal ah oo ku aaddan cabashada kaasoo ka hadalaya sheeogasho kasta oo cabashada ku jirta wuxuuna ka koobanyahay:
   a. helitaanka xaqiiqooyinka iyo waxa lagu soo gabagabeeyay. iyo
   b. sababta go'aanka kama danbaysta ah ee Waaxda Waxbarashada Iowa.

**Ma la ogaayahay wakhti dheerayn ka danbaysa 60 bari?**
Nidaamka Waaxda WaxbarashadaIowawuxuu ogalyahay wakhti kordhinta kali ah haddii:

1. Ay jiraan xaalado laga soo reebayo taasoo la xiriirta cabasho khaas ah, ama
2. Ay waalidka iyo ajansiga dadwaynuhu isku raacaan in la kordhiyo wakhtiga howlaha la qabanayo.

**Sidee loo hirgaliyaa go'aamada cabashada?**
Nidaamka Waaxda Waxbarashada Iowa waxaa ku jira tilaabooyinka si wax ku ool ah loogu taabbagalinayo go'aankeeda kama danbaysta ah, haddii loo baahodo, oo ay ku jiraan:

1. Howlaha Caawinta Farsamo;
2. Wadahadalada; iyo
3. Tilaabooyinka sixitaanka si loogu guulaysto u hogaansanka.

**Yaa xarayn kara cabahsho sideese loo sameeyaa?**
Urur ama shakhsi ayaa xarayn kara cabasho qoraal ah oo sixixan. Cabashada waainay ku jirtaa warbixinta sheegaysa in ajansiga dadwaynuhu uu jabiyayshuruudaha Qaybta C ee IDEA.Cabashada sidoo kale waa inay ku jirtaa:

1. xaqiiqooyinka ay warbixintu ku dhisantahay;
2. sixiixa iyo warbixinta meesha lagala xidhiidhayo; iyo
3. cabshadu waa in ay cadeysaa in jabintu ay dhacday in aan ka badnayn hal sano ka hor taariikhda caabshda la helay.

Haddii cabashadu ay caddeyso in ay dhacday jabinta la xiriirta ilmo gaar ah, cabashada waa inay ku jirtaa:

1. Magaca iyo ciwaanka meesha uu ilmuhu daganayahay;
2. Magaca Damiinka Gobalka/ajansiga barnaamijka masuulka ka ah adeegyada ilmaha;
3. Marka laga hadlayo arinta ilmaha guri la'aanta ah (ee soo hoosgalaya macnaha qaybta 725(2)ee Xeerka Caawinta Guri la'aanta McKinney-Vento(42U.S.C.§11434a(2)),warbixinta meesha ilmaha lagala xirirayo ee la heli karo, iyo magaca Damiinka Gobalka /ajansiga/masuulka ka ah adeegyada ilmaha;
4. Qeexitaanka nooca dhibaatada ilmaha, oo ay ku jiraan macluumaad la xiriira dhibaatada, iyo
5. Xalka la soo jeediyay in dhibaatada lagu xaliyo inta ugu badan ee la garanayo ee loo heli karo dhinac marka cabashada la xareeyay.

Dhinaca xaraynaya cabashdaa waa inuu diraa koobi cabashda ka mid ah Damiinka gobalka ee u adeegta ilmaha isla markaasna wuxuu cabashada ka xaraynayaa Waaxda Waxbaradhada Iowa.

# HABKACABASHOOYINKATAAGAN(HABKADHAGAYSIGA DACWADDA)

Markastoo la xareeyo habka dhagaysiga dacwadda taagan, adiga ama Damiinka Gobalka ee ku shaqada leh khilaafka waa inaad fursad u heshaan habka dhagaysiga dacwaddda taagan oo cadaalad ah.foomaka moodhelka ee lagu xareeyo cabashada taagan iyo codsiga dhagaysigu waxya ku yaalaan bogga 24 ee buuggan.

**Yaa masuul ka ah qabashada dhagaysiga dacwadda taaggan?**
Waxaa dhagaysiga qabanaya Waaxda Waxbarashada Iowa.

**Yaa dhagaysta warbixinta oo go'aank ka gaara habkda dhagaysiga dacwadda taagan?**
Qof wata masuuliyadda qaadiga maamulka maxkamadda (ALJ) ayaa dhagaysta dacwadda iyo muranka sharciga ah ee habka dhagaysiga dacwada taagan.kadib g'aanka waxaa gaara ALJ.Waaxda waxbrashada Iowa waxay haysataa liistada dadka u ALJ ha. Liistada waa in ay ku qornaataa aqoonta qof kastoo dadkaas ka mid ah..

**Maxay tahay aqoonta looga baahanyahay qof dhexdhexaad ah oo ALJ ah?**
Ugu yaraan, ALJ waa inuusan noqon:

1. Qof u shaqeeya Waaxda Waxbarashada Iowa, IDEA ama dagmada ku shaqada leh daryeelidda ilmaha; ama IDEA ama dagmada ku shaqada leh daryeelidda ilmah, ama
2. Qof leh dan shakhsiyeed ama mid xarfadeed oo ka hor imaanaysa qofka loo qabanayo dhagaysiga dacwadda.

ALJ:

1. Waa inuuleeyahay cilmiga iyo awoodda uu ku fahmi karo qodabada IDEA 2004, Xeerarka Faderaalka iyo kuwa Gobalka ee la ku aaddan IDEA, iyo sida sharci ahaan ay wax u turjumaan maxkamadaha Federaalka iyo kuwa Gobalka;
2. Waa inuu leeyahay aqoonta iyo awood uu ugu qabto dhagaysiga si waafaqsan, oo ku haboon sharciga;iyo
3. Waa inuu leeyahay aqoonta iyo awoodda uu ku bixiyo go'aamo qoraal ah oo haboon, oo waafawsan sharciga.

Teeda kale qofka u qalma inuu dhagaysi qabto kuma aha shaqaalaha ajansiga kaliya in asaga ama iyada uu ajansigu lacag ku siiyo inuu u adeeggo ALJ ahaan.

**Wakhti xaadirkan adeeggee buu ilmahaygu helaa?**
Inta lagu jiro dacwad kastoo maxkamadeed ama mid maamul, ilmaha waa in ay u sii soctaa helidda adeegyada caawinta wakhti hore si waafaqsan sidii ay ku ogalaadeen IFSP waalidku . Haddii habka cabashada taagan ay ku saabsantahay codsiga adeegyada hore ee soo hoos galaya Early ACCESS, ilmuhu waa inuu helaa adeegyadaas uusan muranku ka taagnayn.

**Maxay yihiin xuquuqahayga habka dacwadda taagan ee uu sharcigu ii ogalyahay?**
Waxaad xaq u leedahay:

1. In ay ku wehliyaan oo ay kula taliyaan dad cilmi khaas ah iyo tababar u leh dhibaatoooyinka caruurta naafada ah;
2. Inaad keento caddeyn iyo difaac, baadhis, inaad dalbato imaanshaha markhaatiyo;
3. Inaad mamnuucdo soo saaridda caddeyn la keeno meesha dhagaysiga taas oo aan la tusin dhinacaas ugu yaraan shan maalmaha shaqada ah dhagaysiga ka hor;
4. Inaad hesho qoraaalka dhagaysiga ah oo qoran, ama sida uu walidku rabo ah, ama elektaroonig ahaan ah; iyo
5. Inaad ku hesho qoraal ahaan, ama sida uu waalidku rabo, macluumadka la ogaaday oo elektaroonig ahaan ah.

Ogow sidii sharcigu qabo ajansiyada dadwaynuhu waxay sidookale leeyihiin sadexdan xuquuqood.

**Xaggee buu dhagaysiga dacwaddu ka dhici doonaa?**
Habka dhagaysiga dacwadda waa in lagu sameeyaa wakhti iyo goob waalidka ku haboon.

**Waa maxay wakhtiyada jadwalka dhagyaisga dacwadda?**
Waaxda Waxbarashada Iowa waa in ay xaqiijisaa in wax aan badnayn 30 maalmood:

1. Dhagaysiga looga gaaro go'aan kamadanbaysa ah; iyo
2. In koobi ka mid ah go'aanka loo diro dhinac kasta.

ALJwuxuu kordhin karaa wakhtiga sodanka maalmood ah markuu dhinac codsado.

**Ma waxaa jira jadwal wakhtiyaysan oo tahay in la raaco marka la codsaanyo habka dhagaysiga dacwada taagan?** Adiga ama Damiinka Gobalku waa inaad ku codsataan dhagaysi cadaalad ah laba sano gudahood oo ka bilaabta taariikhda adiga Damiinkaaga Gobalku aad ogaateen ama ay ahayd inaad ogaataan tilaabada suurtagalka ah ee samaysa aasaaska codsiga dhagaysiga dacwadda taagan.

**Ma waxaa jira wax laga soo reebayo wakhtiga la jaangooyay?**
Wakhtiga la jaangooyay kuguma dabakhmayo haddii lagaa hor istaagay xaryanta codsiga dhagaysiga dacwadda iyadoo ay sababtu tahay:

1. Si khaldan oo uu u fasirtay Damiinka Gobalku in ay xaliyeen dhibaatada keenaysay codsiga dhagaysiga dacwadda.
2. Damiinka gobalka oo kaa xaniba warbixin ay ahayd in lagu siiyo.

**Miyaa layga hor istaagayaa inaan xareeyo codsiyo kale oo dhagaysiga habka dacwadda taagan ah?**
Ma jirto wax kaa hor istaagaya xaraynta codsi kale dhagaysi dacwadeed oo gaar ah oo aad ka leedahay arin ka duwan codsigii dhagaysiga ee horey loo xareeyay.

**Goa'aanka ALJ ma kii ugu danbeeyay baa?**
Go'aanka lagu gaarodhagaysiga waa kama danbaysa, mrka lag reebo in dhinac kasta oo dhagaysiga ku lug leh uu racfaan ka qaadan karo go'aanka.

**Haddii aanan ku faraxsanayn go'aanka ALJ, maxaan samayn karaa?**

Dhinac kasta wuxuu yeelan doonaa xaq uu ku qaado tilaabo madani ah taasoo la xiriirta go'aanka habka dhagaysiga dacwadda taagan tilaabada noocaas ah waxaa la keeni karaa maxkamad kasta oo gobal oo leh hanaan garsoor ama maxkamad dagmo oo Maraykanka ah, iyadoon loo eegayn heerka xoogga ay leedahay sheegashadaas.

**Ma waxaajira wakhti loo jaangooyeey in lagu xareeyo tilaabo madani ah oo ku saabsan go'aanka ALJ?**

Hadii aad ku khilaafto go'aanka ALJ, waxaad haysataa 20 maalmood oo ka bilaabta taariikhda go'aanka si aad u xarayso tilaabo madani ah.

**Yaa kaloo wax ka ogaan doona go'aanka dhagaysiga dacwadda taagan?**

Waaxda Wxbarashada Iowa, kadib mark ay tirtirto warbixinta shakhis ahaan loo aqoonsan karoi, waa in ay:

1. Tu gudbisaa waxyaalaha la ogaaday iyo go'aamada Golaha Iowa ee Early ACESS; iyo
2. Waana in ay macluumaadkaas iyo go'aamadaas ay dadwaynaha u heli kartaa.

**XUSUU SIN:**

## Foomka Moodheelka:Codsiga Dhexdhexaadinta Shirka

Isticmaal foomkan haddii aad rabtid inaad codsatid shirka dhexdhexaadinta.Habkaas waxaa lagu sharaxay bogagga 13 iyo 14 ee bugga *Nidaamka Masuuliyadda Waalidka (Xuquuqda Waalidnimo ee Caawinta Hore). Kadib markaad buuxiso foomkan, u dir koobiyo*:
(1)AEAda ku lugta leh, iyo
(2) IowaDepartmentofEducation, Grimes State OfficeBuilding, 400 E.14th St., Des Moines,IA 50319-0146.
Fooomkan buuxi gabi ahaanba.Isticmaal warqado dheeri ah ama xaashiyo, haddii aad u baahato.

Taariikh:__________________ waxaan jeclaan lahaa inaan codsado shirka dhexdhexaadinta Early ACCES kaas oo ku saabsan ilmahayga.

Magaca Ilmaha:______________________________________________Taariikhda Dhalashada Ilmaha:
ilmahaagu ma isticmaalaa magaca kale?Haa/Maya ____________Haddii ay saas tahay, waa maxay?Ciwaanka ilmaha:Magaalada:________________________________________________Gobalka:ZIP:_____________________
Ilmuhu ma guri la'aan baa"?Haa/Maya Haddii ay saas tahay, sheegi warbixinta meesha ilmaha lagala soo xidhiidhayo.___________________

AEA Xaggee Ilmuhu Kunoolyahay:
Ciwaanka:_____________________________________________________________________________________
City:___________________________________Gobalka:__________________________________________ZIP:
AEA Xaggee Ilmuhu Xaadiraa:
Ciwaanka:_____________________________________________________________________________________
City:___________________________________Gobalka:__________________________________________ZIP:

Magacayga:_____________________________________________________________________________________
Ciwaankayga:___________________________________________________________________________________
Magaalada:______________________________Gobalka:__________________________________________ZIP:
Telefoon:__________________________________________________________________Iimayl(haddii uu jiro):
Magaca kale ee waalidka:
Ciwaanka:_____________________________________________________________________________________
Magaalada:______________________________Gobalka:__________________________________________ZIP:
Telefoon:_________________________________Iimayl (haddii la heli karo):___________________________

Nooca dhibaatda:

Macluumaadka kiiska la xiriira dhibaatada:

Xalka kula quman ee dhibaatada

Foomkan ma waxaa buuxiyay cid aan ahayn waalidka?_________Haa/Maya____haddii ay haa tahay, fadlan qor magacaaga, meesha lagaala soo xidhiidhayo, iyo waxa aad isu tihiin waalidka:____________________

______________________________________________________________________________________________
Ma waxaa jira qof kale oo aan lagu qorin foomkan kaasoo ah masuulka ama waalidka ilmaha?Haa/Mayahaddii ay saas tahay, Fadlan qor magaca qofkaas, warbxinta meesha lagala so oxidhiidhayo, iyo waxa ay ilmaha isu yihiin:____________________________________________________________________

THISPAGEINTENTIONALLYLEFTBLANK

## Foomka Moodheelka: Cabashada Gobalka ee IDEA

Isticmaal foomkan haddii aad rabtid inaad xaraysid cabashada gobalka.Habkaas waxaa lagu sharaxay bogagga 15 iyo 16 ee bugga *Nidaamka Masuuliyadda Waalidka (Xuquuqda Waalidnimo ee Caawinta Hore). Kadib markaad buuxiso foomkan, u dir koobiyo*:
(1)AEAda ku lugta leh, iyo
(2) IowaDepartmentofEducation, Grimes State OfficeBuilding, 400 E.14th St., Des Moines,IA 50319-0146.
Fooomkan buuxi gabi ahaanba.Isticmaal warqado dheeri ah ama xaashiyo, haddii aad u baahato.
.

Taariikhda:___________ Waxaan xaraynaya cabashada gobalka ee IDEA. Waxaan baadhis ka codsanayaa Waaxda Waxbarashada Iowa.Waxaan ku doodayaa in ajansiyada dadwaynuhu ay jabiyeen shuruudda Qaybta C ee Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah iyo hirgalinta shuruucda gobalka iyo xeerarka faderaalka.

Magacayga:________________________________ **Sixiixa:**_____________
Ciwaankayga:________________________________________________
Magaalo:_________________________Gobal:_______________ZIP:____________
Telefoon:_________________________Iimayl(haddii la heli karo):_______________
CABASHADAN MA WAXAY KU SAABSANTAHAY ILMO GAAR AH? HAA/MAYAHADDII AY "HAA TAHAY," FADLAN QOR: Magaca Ilmaha:__________________________
__________________Taariikhda Dhalashada Ilmaha:__________________________
Ilmuhu ma isticmaalaa magic kale?______Haa/Maya___Haddii ay saas tahay, muxuu yahay?________________
Ciwaanka Ilmaha:________________________________________________
Magaalada:_________________________Gobalka:_______________ZIP:____________
Ilmuhu ma "guri la'aan baa"? ___Haa/Maya___Haddii ay saas tahay, sheeg warbixinta meesha ilmaha lagala soo xiriirayo.___________________
AEA MEESHA Ilmuhu Kunoolyahay:________________________________
Ciwaanka:________________________________________________
Magaalada:_________________________Gobalka:_______________ZIP:____________
AEAMeesha Ilmuhu Xaadiro:________________________________________________
Ciwaanka:________________________________________________
Magaalada:_________________________Gobalka:_______________ZIP:____________

**Xusuusin:**Su'aalaha1-3 ayaa loo baahanyahay haddii cabashadu khusayso ilmo gaar ah. Haddii aysan saas ahayn, su'aalaha1-3 ayaa lagu talinayaa in laga jawaabo.

1. Nooca dhibaatada:

2. macluumaadka kiiska ee la xiriira dhibaatada:

3. Xalka aad soo jeedinayso ee xalinta dhibaatada:

Jabinta shuruudaha miyay dhacday wax aan ka badnayn hal snao ka hor taariikhda ay Waaxda Waxbarashada Iowa ay heshay cabashada? ____Haa/Maya_

Foomkan ma waxaa buuxiyay cid aan ahayn waalidka sida urur?______Haa/Mayahaddii ay haa tahay, fadlan qor magacaaga, meesha lagaala soo xidhiidhayo, iyo waxa aad isu tihiin waalidka haddii uu ka duwanyahay kan kore:__
________________________________________________

________________________________________________
Ma waxaa jira qof kale oo aan lagu qorin foomkan kaasoo ah masuulka ama waalidka ilmaha?_____Haa/Mayahaddii ay saas tahay,
Fadlan qor magaca qofkaas, warbxinta meesha lagala so oxidhiidhayo, iyo waxa ay ilmaha isu yihiin:____________

________________________________________________

THISPAGEINTENTIONALLYLEFTBLANK.

## Foomka Moodhelka:Habka Cabashada Taagan(Codsiga Habka Dhagaysiga)

| |
|---|
| Isticmaal foomkan haddii aad rabtid inaad xaraysid cabashada gobalka. Habkaas waxaa lagu sharaxay bogagga 17 iyo 19 ee bugga *Nidaamka Masuuliyadda Waalidka (Xuquuqda Waalidnimo ee Caawinta Hore) ee Early ACCESS. Kadib markaad buuxiso foomkan, u dir koobiyo*:<br>(1)AEAda ku lugta leh, iyo<br>(2) IowaDepartmentofEducation, Grimes State OfficeBuilding, 400 E.14th St., Des Moines,IA 50319-0146.<br>Fooomkan buuxi gabi ahaanba. Isticmaal warqado dheeri ah ama xaashiyo, haddii aad u baahato.. |

Taariikhda:___________ waxaan xaraynayaa habka cabashada taagan ee ku saabsan ilmahayga. Waxaan ka hor codsanayaa dhagaysiga dacwadda habka qaadiga sharciga hortiisa oo ay magacowday Waaxda Waxbarashada Iowa.

Magaca Ilmaha:_____________________________________________Taariikhda Dhalashada Ilmaha:

ilmahaagu ma isticmaalaa magaca kale?Haa/Maya______Haddii ay saas tahay, waa maxay?

Ciwaanka ilmaha:

Magaalada:_________________________Gobalka:_______________________ ZIP:_______________

Ilmuhu ma guri la'aan baa"?Haa/Maya Haddii ay saas tahay, sheegi warbixinta meesha ilmaha lagala soo xidhiidhayo.________________________

AEA Xaggee Ilmuhu Kunoolyahay:
Ciwaanka:________________________________________________________________________
City:_________________________________Gobalka:____________________ZIP:_______________
AEA Xaggee Ilmuhu Xaadiraa:
Ciwaanka:________________________________________________________________________
City:_________________________________Gobalka:____________________ZIP:_______________

Magacayga:________________________________________________________________________
Ciwaankayga:_____________________________________________________________________
Magaalada:_____________________________Gobalka:____________________ZIP:______________
Telefoon:_____________________________________________________Iimayl(haddii uu jiro):
Magaca kale ee waalidka:
Ciwaanka:________________________________________________________________________
Magaalada:_____________________________Gobalka:____________________ZIP:______________
Telefoon:______________________________Iimayl (haddii la heli karo):_______________________

Nooca dhibaatda:

Macluumaadka kiiska la xiriira dhibaatada:

Xalka kula quman ee dhibaatada

Foomkan ma waxaa buuxiyay cid aan ahayn waalidka?________Haa/Mayahaddii ay haa tahay, fadlan qor magacaaga, meesha lagaala soo xidhiidhayo, iyo waxa aad isu tihiin waalidka:______________________
______________________________________________________________________________

Ma waxaa jira qof kale oo aan lagu qorin foomkan kaasoo ah masuulka ama waalidka ilmaha?Haa/Mayahaddii ay saas tahay,
Fadlan qor magaca qofkaas, warbxinta meesha lagala so oxidhiidhayo, iyo waxa ay ilmaha isu yihiin:____
______________________________________________________________________________

THISPAGEINTENTIONALLYLEFTBLANK

**OGEYSIIS MUHIIM AH OO WAALIDIINTA KU SOCDA:** Qaanuunka Federaaliga ah ayaa qasab ka dhigayaa in qoysaska la siiyo warbixintan ku saabsan sida "Early ACCESS" loo maal galiyo mar kasta oy Early ACCESS doonto in ay hawlgaliso caymiska guud ee dadweynaha ama ka gaarka loo leeyahay

## Waaxda Waxbarashada ee Iowa, Laanta ugu weyn ee Early ACCESS integrated System ee bixisa adeegyada wax ka qabadka hore (Qaybta C ee Sharciga waxbarashada curyaanka)

### Nidaamka lacag bixinta, sida waafaqsan sharciga dib loo akhriyey ee la meel mariyey 29ii March, 2012kii, lana daabacay April 28, 2012ii, sixid iyo dib u habaynna lagu sameyey, June 2013,

Waaxda Waxbarashada ee Iowa waxay qaadatay nidaamkan lacag bixinta ee soo socda, kaas oo xilli aad u dhaw dib u habayn lagu sameeyey qodobbo sharcina loo dajiyey kuwaas oy arkeen Golaha Waxbarashada Gobolka Iowa January 26, 2012 qaateenna 29ii March, 2012kii.

### I. Adeegyada Early ACCESS waa in ay "Bilaash" Ahaadaan.

Gobolka Iowa waa gobol waajib iskaga dhigay adeegga waxbarasho ee lacag la'aanta ah.Arag qodobka § 256B.2 (2011).Gobolka Iowa wuxuu bixiyaa waxbarasho dadweyne oo habboon oo lacag la'aan ah, waana ta loo yaqaanno ("FAPE") waxayna siisaa caruurta curyaanka ah ee da'doodu ka yartahay 21 sano kuwaas oo u baahan waxbarasho gaar ah.*Id.* § 256B.2(3).

Sidaa darted, waaxdu waxay cadaynaysaa in waalidka aan wax lacag ah lagaga qaadayn adeegyada hoos yimaadda qodobka 256B ee Waxbarashada Tayada leh ee lacag la'aanta ah ee caruurta.

### II. Waaxdu ama deeq-bixiyeyaasheeda gobolladu waxaa u furan in ay dalbadaan hawlgalinta Caymiska Qoyska ee Dadweynaha ama kaalmooyinka dadweynaha ayaga oo hawlgalinaya qaybta XIX ee "Medicaid" ee Sharciga Social Security Act.

Deeq bixiyeyaasha gobollada ee Early ACCESS iyo adeeg bixiyeyaasha kale waxaa u furan in ay hawlgaliyaan caymiska Medicaid ee qoyska. Adeeg bixiyeyaasha Early ACCESS shardi kagama dhigaan waliidka in ay isu diiwaan galiyaan adeeg dadweyne ama adeeg caymis si ay u helaan adeegyada Early ACCESS, waana in ay helaan ogolaansho inta ayna adeegsan caymiska iyo kaalmooyinka dadweyne ee waalidka ama

ilmaha, mar haddi ilmaha ama waalidku barnaamajka horey ugu qorneyn.

*Nooca iyo Qiimaha Medicaid ee loo celinayo.*Lacagaha Kaalmooyinka iyo caymiska ayaa lagu bixiyaa qarashka adeeg-bixiyeyaashu ay ku galaan adeegga dadka.Waaxda gobolka Iowa ee adeegyada dadka ayaa go'aan ka gaadha inta lacagta la bixinayo tiradeedu dhantahay iyo adeegyada caymiska kujira.Waa in lacagtu aysan ka badan lacagta dhabta ah ee adeegbixiyaha kaga baxday adeegyada caymiska ku jira.

*Adeegyadu waa kolba sida sida nidaamka lacag bixintu yahay*. Sida Waaxda Adeegga Dadweynuhu ay leedahay, lacag celinta Medicaid "waxaa loo sameeyaa waxyaabaha maqalka ku saabsan ee daruuriga ah, adeegyada koritaanka ku saabsan, adeegyada caafimaadka iyo kalkaalin caafimaad, adeegyada qaaditaan caafimaad, adeeg nafaqo, adeegyada daweynta dhaqdhaqaaqa iyo shaqada jidhka, adeegyada daweynta dawaynta dabiiciga ah (sida duugidda), falanqaynta xaaladda nafsi ahaaneed, talo bixin, shaqo bulsho, adeegyada hadalka-luuqadda, adeegyada aragga iyo isku xidhidda adeegyada ama adeegyada maaraynta xaaladaha".

Si aad u heshid adeegga Medicaid iyo lacag celintiisa, waa in aad diiwaan gashantahay ama ku xidhiidhsantahay adeegga qorshaysan ee ilmaha qoyska ka tirsan "Individualized Family Service Plan IFSP).

Si aad u heshid adeeggyada bulsho ee kaalmooyinka ama caymiska sida Medicaid, waa in adeeg-bixiyuhu waalidka ogeysiis ku lifaaqan qoraalkan hoos ka raacsan oo kale ah(Appendix A) uu siiyaa waana in uu u cadeeyaa in waxani asaga ayna wax lacag ah kaga baxayn sida ku cad lifaaqa (Appendix B).

Waaxdu oogama baahna waalidka in nidaamkan Medicaid uu wax lacag ah ku ku kabo ama lacag lagaga goosto. Ayada oo raacaysa sharciyadeeda oo hadana raacaysa cinwaanka XIX ee sharciga Social Security Act, waaxda adeegyada dadku waxaysan ka maarmayn hawlgalinta caymisyada furan ee gaar ahaaneed mar kasta oy dooneyso in lacagcelin ay ku samayso adeegyada Medicaid. Nidaamkaasi wuxuu ku qoranyahay ogeysiiska lifaaqa (Appendix A)iyo qaybta soo socota.

Waalidku haduusan ogolaan isticmaalka adeegyada Medicaid ama uusan ogolaan in uusan macluumaadkiisa qof ahaaneed uusan la qaybsan waaxda adeegyada dadka si loo xisaabo waxyaabaha ku baxaya adeeggiisa Medicaid, waaxda iyo adeeg-bixiyeyaasha Early ACCESS ma ay ma hawlgalin doonaan kaalmooyinka furan ee Medicaid.

Waalidku haduusan ogolaan isticmaalka adeegyada Medicaid ama uusan ogolaan in uusan macluumaadkiisa qof ahaaneed uusan la qaybsan waaxda adeegyada dadka si loo xisaabo waxyaabaha ku baxaya adeeggiisa Medicaid, waaxda iyo adeeg-bixiyeyaasha Early

ACCESS wali way sii wadayaan adeegyada qorshaysan ee ilmaha qoyska ka tirsan oo dhan “Individualized Family Service Plan IFSP)waana adeegyada waalidku ogolaanshaheeda hor u bixiyey.

### III. Waaxda Adeegga Dadku marka ay dooneyso in lacagta “Medicaid” ee sharciga XIX ee Social Security Act ay bixiso, waxay amar siisaa adeeg bixiyeyaasha caymisyada Caafimaad ee gaar ahaaneed

Qodobka XIX ee Social Security Act wuxuu amraa Waaxda Adeegga Dadka in lacagcelin ka hesho nidaamyada gaarka loo leeyahay ee caymiska mar kasta oy Waaxda Adeegga Dadku doonto in ay lacag ku bixiso sheegashada lacagadeed ee Medicaid.

Mar kasta oy Waaxdu ama adeeg-bixiye raacsan Early ACCESS ay damcaan in ay hawlgaliyaan adeegga Medicaid ee ilmaha ama waalidka ayada oo waalidku ama ilmuhu uu u furanyahay adeeg caymis oo gaar ahaaneed, Waaxdu ama adeeg-bixiyaha raacsan Early ACCESS waxay codsadaan in ay helaan ogolaanshaha waalidka si loo helo caymiska gaar ahaaneed sida hoos ku tilmaaman.

*Nooca iyo Qiimaha Caymiska Gaar ahaaneed.*Qaybta kaalmooyinku waxay waaxda adeegyada dadka u celisaa lacagihii ay Medicaid ay ku bixisay.Bixiyaha adeegga gaar ahaaneed ee caymiska ayaa jaangooya tirada lacagta la bixinayo inta ay dhantahay iyo adeegyada la caymiyey.Waa in lacagta la bixinayo aysan ka badan wixii dhabta ahaa ee adeeg bixiyaha kaga baxday adeegyada caymisan.

Adeegyada oo ku xidhan qaabka lacag bixinta caymiska gaar ahaaneed, waa in ay waafaqsanaadaan shuruudda qaybta (II) ee kor ku xusan, waana in ay ahaadaan adeegyo hoos iman kara nidaamka caymiska gaarka ah ee la ogolyahay. Bixiyaha caymiska gaarka ah ayaa jaan gooya in adeeg adeegyada Early ACCESS ka mid ah uu yahay adeeg nidaamkeeda qoran ku caymisan iyo in kale.

Xaaladahan soo socda waa in ogolaanshaha waalidka la helaa si loo hawlgaliyo caymiska:

- Marka laan guud ama adeeg bixiye hoos taga Early ACCESS ay doonayaan in ay hawlgaliyaan caymiska gaar ahaaneed ama kaalmooyinka waalidka ama ilmaha si loo bixiyo qarashka adeeg ka mid ah adeegyada EARLY ACCESS ee ah adeegga qorshaysan ee ilmaha qoyska ka tirsan IFSP iyo;
- Mar kasta oo loo baahdo ogolaanshaha waalid sida ku xusan qodobka nidaamka Early ACCESS ee 281-120.420(1)sababtuna ay tahay badadashada iyo daba dheeraashada adeegga qorsheysan ee Ilmaha qoyska ka tirsan (IFSP).

Waaxdu kama dooneyso waalidku in uu wax qarash ah ku bixiyo hawlgalinta dawladda ee caymiska gaarka ah si loo bixiyo qarashaadka adeegyada Early ACCESS (oy ka mid yihiin lacago kabid ah, lacag joogta ah oo la gooyo, lacagta joogtada ah mid dul saran, ama lacagaha la goosto). Marka waalidku codsado ayay laanta ku shaqo leh u celinaysaa waalidka qarashaadka uu galay.

Marka ogolaanshaha hawlgalinta caymiska gaarka ah ama kaalmooyinka ama hawlgalinta hore ee kaalmooyinka hoos taga nidaamka caymiska ilmaha ama waalidka si qarashaadka adeegyada Early ACCESS loo bixiyo, dowladdu waxay waalidka siinaysaa sawirka (copy ga) nidaamka lacag bixinta ee waaxda. Kuwaasi waa qaraamaha waalidka kaga bixi kara marka caymiska gaarka ah ee waalidka la hawl galiyo ee loo adeegsado bixinta qarashka adeegyada Early ACCESS:

- lacag kabid ah, lacag dul saran lacagaha joogtada loo bixiyo, ama lacagaha la goosto (kuwaas oo dhan oo loo celin doono), iyo
- Qarashaadka kale ee mudada dheer sida waayitaanka kaalmooyinka taas oo loo gooyay caymiska sannadlaha ah ama caafimaadka nolosha oo dhan ah ee raacsan nidaamkan.

Haddii mid ka mid ah waalidku uu su’aal ka qabo caymiska gaar ahaaneed, waalidku wuxuu la xidhiidhi karaa bixiyaha caymiska caafimaad ee gaar ahaaneed. Xidhiidhiyaha adeegga ayaa fududayn kara wadahadalka.

Haddii waalidku uusan ogolaan hawlgalinta caymiska gaar ahaaneed ee waalidka ama ilmaha oo qayb ka ah sheegashada Medicaid, waaxdu iyo adeeg-bixiyaha Early ACCESS ba ma soo gudbinayaan dalab lacag celin oo raacsan Medicaid.

Haddii waalidku uusan ogolaan hawlgalinta caymiska gaar ahaaneed ee waalidka ama ilmaha ee ka midka ah sheegashada Medicaid, waxaa laanta waajib ku ah in ay bixisaa ama sii waddo adeegyada Early ACCESS ee ilmaha iyo qoyska IFSP kuwaas oo waalidku ogolaanshahooda hor u bixiyey.

**IV. Waaxdu iyo Deeq-bixiyaha goboklku ma dalbadaan bixinta caymiska caafimaad ee gaar ahaaneed marka sheegashadu ayna hoos imanayn ("Medicaid") cinwaanka XIX ee qaanuunka Social Security Act.**

In kasta oo sharciyada qoran ee waaxdu ay u ogolyihiin laamaha dadweyne in xilliga ay doonaan ay bixiyaan adeegga caafimaad ee gaar ahaaneed, xilligan aan joogno gobolka Iowa sharci kama aha lagagamana dhaqmo in la codsado caymis caafimaad oo gaar ahaaneed mar haddii uusan xidhiidh la lahayn Medicaid ka loogu hawl galo adeegyada Early ACCESS. Wax qorshe ah oo la hindisay oo lagu badalayo nidaamkaas ma jiro.

Ayada oy jirto in waaxdu ay qaadatay qodobka sharciga ee ah 34 C.F.R. § 303.520(b)(2),waaxdu ma hirgalin karto qodobkaas, maxaa yeelay wali lama meelmarin qodobada ka farcama qodobkan.

**V. Waxyaabo kale: Nidaamka lacag bixinta Iowa ee Early ACCESS**

Waaxdu waxay qaadatay nidaamka "bixiyaha ugu dambeeya" ayada oo taas qodob maamul ka dhigtay.Qodobkaasi wuxuu ku jiraa lifaaqa C.

Nidaamkan iyo qodobada maamul ee nidaamku fulinayo ayaa ah kuwo loogu tala galay in ay noqdaan kuwo waafaqsan 34 C.F.R. § 303.521.

Nidaamkani wuxuu tilmaamayaa shaqooyinkaas iyo adeegyadaas waafaqsan nidaamka Iowa ee lacag bixinta ee qeybta (II) iyo qaybta (III) (waana in lacagahaasi ayna ka badan qiimaha dhabta ah ee adeegbixinta).

Sida ku qoran qaybta 1aad ee nidaamkan, in uu ruuxu awoodo ama uusan awoodin ma aha mid ku jirta nidaamka Iowa ee lacag bixinta. In kasta oo u qalmitaanka nidaamka Medicaid uu ku xidhanyahay dakhliga ama hantida ruuxa ee ma guurtada ah, hadana Waaxda Adeegyada Dadka ee Iowa waxay u qalmiddaas ku jaangoysay Qodobka XIX ee Social Security Act.

Qodobada nidaamka Early ACCESS waxaa ku jira waxyaabahan soo socda ee ay xaqiijinayaan.

- Caruurta adeegyada kale ee bilaashka ah ee la siiyo lacag lagagama qaadayo waalidka (waxaa ka mid ah adeegyada lagu cadeeyey qaybtan iyo qaybtii I).
- Adeeg bixiyeyaasha Early ACCESS ma dalban doonaan wax lacag celin ah wixii ka badan qiimaha dhabta ah ee qarashka adeeg bixinta Early ACCESS.
- Qoysaska adeegga caymis dadweyne haysta ama gunnooyin ama caymis gaar ahaaneed lagama soocayo qoysaska kale ee oo ma bixinayaan wax ka badan qoysaska kale een haysan caymis dadweyne ama aan haysan gunnooyin ama aan haysan caymis gaar ahaaneed.

Xaqiijinta awood la'aanta ma aha mid loo baahanyahay, sida ku xusan qaybta I.

Haddii qoys qoosaska ka mid uu ku guul darraysto in uu waaxda Adeegyada Dadka usoo gudbiyo warbixinta dakhliga ama hantida ma guuraanka ah, qoyskaa waxaa dhici karta in ay u qalmi waayaan caymiska Medicaid.

Waaxdu ama adeeg bixiyaha Early ACCESS waxaa u furan in ay adeegsadaan qaybta C ama maaliyad kale si loo bixiyo qaraamaadka sida korsaarka lagaha joogtada loo bixiya, lacagaha la goosto ama lacag qayb ka bixin.

Qodobada qoysaska lacagta lagaga qaado iyo qodobada fa'iidooyinka ka soo xarooda caymiska ee qaanuunka 34 C.F.R. § 303.520(d)-(e) iyo 303.521(d)waxaa qaadatay Waaxda Waxbarashada ee gobolka Iowa, waxayna waaxdu ku qaadatay sharciga maamuleed ee Iowa qodobka 281—120.520(4)-(5)iyo qodobka 281—120.521(4).

Arrimahan soo socda kuma xidhna lacagaha la qaado (fees).

- Hawlgallada marka la raadinayo hirgalinta adeegga caruurta ee Early ACCESS.
- Qiimaynta iyo hawlaha la xidhiidha qiimaynta.
- Adeegga iskuxidhka adeegyada.
- Hawlaha maaraynta iyo isku xidhka ee la xidhiidha:
  - o Horumarinta, dib u eegidda iyo qiimaynta qorshaha ilmaha qoyska IFSP iyo qorshaha ilmaha qoyska eek u meel gaadhka ah IFSP; iyo
  - o Hawlgalinta talaabooyinka lagu adkeyo laguna ilaaliyo Early ACCESS iyo waxyaabaha hoos yimaadda laguna ilaaliyo qodobada 281—120.300 ayada oo la adeegsanayo qodobka 281—120.346

*Tallaabooyinka adkeynta iyo ilaalinta.* Waaliidkii dood ka qaba lacagta la saaray (fees ka ah) ama dood ka qaba go'aanka dowladda ee ah in walidku uu awoodo lacag bixinta, waxaa u furan waxybaahan soo socda:

- In uu wada xaajood ka galo.
- In uu codsado in xaaladdiisa la dhagaysto.
- In uu cabasho dowladda u gudbiyo.
- In aad isticmaashid qaab kale oo dowladdu cadyasay si xal dagdag ah loogu helo lacag sheegashada (waxaana ka mid ah tallaabo fududaynta AEA ama rafcaanka caymiska Medicaid ee Waaxda Adeegyada Dadka ee Gobolka Iowa), waa haddii arrintaasi ayna dib u rid ku keeayn ama ka mamnuucayn waalidka tallaabooyinka uu xaqa ugu leeyahay nidaamka Medicaid waxaana ka mid ah xaqa uu u leeyahay in goortii uu doono uu adeegsan karo seddexda arrimood ee kor faqradan ku qoran.

Waa in waaxdu ay ogaysiisaa waalidka ikhtiyaarradan soo socda ee u furan:

- In waalidka la siiyo sawirka (copy)ga nidaamka gobolka ee lacag bixinta marka uu bixinayo ogolaanshaha si loo siiyo adeegyada Early ACCESS laguna siinayo qodobka Early ACCESS ee qodobka 120.420(1); ama
- In warbixintan lagu daro ogeysiiska la siiyo ayada oo la adeegsanayo qodobka 281-120.421.

## VI. Maamulada

Sharciga Iowa ch. 256B (2011)

34 C.F.R. § 303.510 (2011)
34 C.F.R. § 303.520 (2011)
34 C.F.R. § 303.521 (2011)

Iowa Admin.Code r. 281—120.510 (2012)
Iowa Admin.Code r. 281—120.520 (2012)
Iowa Admin. Code r. 281—120.521 (2012)

**LIFAAQ (A)**
**OGEYSIIS KU SAABSAN ISTICMAALKA EARLY ACCESS EE MEDICAID**

Ka hor inta Waaxda Waxbarashada ama adeeg bixiyaha Early ACCESS ayna hawlgalin kaalmooyinkaaga dadwayne ama caymiska ama kaalmooyinka dadweyne ee ilmahaaga ama caymiskiisa si loo bixiyo qarashka adeegyada Early ACCESS, waa in wakaaladdu ay ku siisaa ogeysiis qoran. Fadlan si wanaagsan oo taxaddar leh u akhri waxyaabahan soo socda.

Medicaid

- Waa in la helaa ogolaanshaha waalidka ayada oo la adeegsanayo qodobka Early ACCESS ee 281-120.414 (34CFR303) (waa haddii qodobkaas uu ku khuseeyo) ka hor inta waaxdu ama adeeg bixiyaha Early ACCESS uusan macluumaadka ilmahaaga u gudbin Waaxda Adeegyada Dadka ee ah laanta Gobolka ee mas'uulka ka ah maaraynta barnaamajka Medicaid ee Gobolka.
  Qodobkan 281-120.414 (34CFR303) (haddii uu khuseeyo) wuxuu waalidka siinaya xaqa ah in uu xilligii uu doono ka noqdo in uu macluumaadka ilmihiisa uu siiyo Waaxda Adeegyada Dadka si xisaabaadka loo sameeyo.
- Waaxda iyo adeeg bixiyaha Early ACCESS midna kaama codsan doonaan in aad isu diiwaan galisid kaalmooyinka dadweyne ama barnaamajyada caymiska ayaga oo markaa taas shardi ka dhigayn si aad u heshid adeegyada Early ACCESS, waliba waa in ay helaan ogolaanshahaaga si ay kuugu hawlgaliyaan kaalmooyinka dadweyne ama caymiska dadweyne, ama caymiska ilmahaaga ama kaalmooyinka dadweyne ee ilmahaaga, haddii ilmahaagu uusan adeegyadaas u diiwaan gashanayn. Waaxdu ama adeeg bixiyaha Early ACCESS waa in ay helaan ogolaanshaaga si loo hawlgaliyo kaalmooyinka dadweyne ama caymiska ilmahaaga ama kaalmooyinka dadweyne ama caymiska eed adigu leedahay si loo bixiyo qarashka adeegyada Early ACCESS, taasina waa haddii isticmaalkaasi:

  - Uu yaraynayo mudada caymiska ama uu yaraynayo mudada kaalmada caymisan ee ilmahaaga iyo adigaba;
  - Ugu dambayntii kaa dhigayo mid iska bixin kara adeegyadan aad ku helaysid kaalmyooinka dadweyne ama barnaamijyada caymiska;
  - Uu sababayo in joogtada (premiums) la la kordhiyo ama la joojiyo kaalmooyinka dadweyne ama caymiska ee adiga ama ilmahaaga la siiyo; ama
  - Uu khatar galin karo uqalmidaada ama ta ilmahaaga helitaanka xuquuq guri iyo mid bulsho ee ku salaysan qaraamaha caafimaadka.

  Haddii aadan ogolaansho bixin, laantu wali way sii wadaysaa siintaada adeegyada Early ACCESS ee Qorshaha Ilmaha Qoyska (IFSP) kuwaas ood ogolaanshahooda hor u bixisay.
- Waaxda iyo adeeg bixiyaha Early ACCESS midnaba adeegsigaaga kaalmooyinka dadeyne ama caymiska ee ah sida Medicaid lacag ku dar ah kuma saarayaan, wax lacag ah oo lagaa goynayana ma jirto. Haddii uu jiro caymis caafimaad oo gaar ahaaneed, sharciga xukuma Medicaid wuxuu ku qasbayaa Waaxda Adeegyada Dadka in ay adeeggaa dalbato.

Caymiska Gaar ahaaneed Marka Medicaid aad u qalantid

- Waaxdu mahawlgalin karto caymiskaaga gaar ahaaneed si loo bixiyo adeegyada Early ACCESS haddii aadan bixin ogolaansho in la hawlgaliyo caymiskaas gaar ahaaneed si loo bixiyo qaraamaha adeegyada Early ACCESS ee ilmahaaga. Waxaa tan ka mid ah isticmaalka caymiska gaar ahaaneed marka caymiska gaar ahaaneed ee furan loo baahanyahay ka hor isticmaalka kaalmooyinka ama caymiska dadweyne sida Medicaid.

Ogolaanshaaga ku aaddan isticmaalka caymiska gaar ahaaneed waa in la helaa:

  - o Mar kasta oo laan dadweyne ama adeeg bixiye hoos yimaadda Early ACCESS uu doono in uu hawlgaliyo caymiskaaga ama kaalmooyinkaaga dadeyne si loo bixiyo qaraamaha adeegyada hordhaca ah ee Eary ACCESS ee Qorshaha Ilmaha Qoyska (IFSP;) iyo.
  - o Mar kasta oo loo baahanyahay ogolaansho sida qodobka Early ACCESS ee 281-120.420(1) uu qorayo sababtuna ay tahay badashada adeeg bixinta ilmahaaga ee adeegga Qorshaha Ilmaha Qoyska (IFSP).

- Waaxdu kaama dooneyso in aad wax qarash ah ku bixisid hawlgalinta gobolka ee caymiska gaar ahaaneed si loo bixiyo qarashaadka adeegyada Early ACCESS (oy ka mid yihiin lacago kadib ah, lacago joogta ah, ku darka lacagta joogtada ah ama lacagaha la goosto.Marka aad codsatid ayay laanta ku shaqo leh kuu celinaysaa qarashaadka aad gashay.
- Marka ogolaanshaha hawlgalinta caymiska gaarka ah ama kaalmooyinka ama hawlgalinta hore ee kaalmooyinka hoos taga nidaamka caymiska ilmaha ama waalidka si qarashaadka adeegyada Early ACCESS loo bixiyo, gobolku waxay waalidka siinaysaa sawir (copy) ga nidaamka lacag bixinta ee waaxda. Kuwani waa qaraamaha waalidka <u>kaga bixi kara</u> marka caymiska gaarka ah ee waalidka la hawl galiyo ee loo adeegsado bixinta qarashka adeegyada Early ACCESS:

o lacago kabid ah, kor saarka lacagaha joogta loo bixiyo, ama lacagaha la goosto (kuwaas oo dhan oo loo celin doono), iyo

  - o Qarashaadka kale ee mudada dheer sida waayitaanka kaalmooyinka taas oo loo gooyay caymiska sannadlaha ah ama caamifaadka nolosha oo dhan ee raacsan nidaamkan.

Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid caymiska gaar ahaaneed, waxaad la xidhiidhi kartaa bixiyahaga caymiska caafimaad ee gaar ahaaneed. Xidhiidhiyaha adeegga ayaa fududayn kara wadahadalka.

- Haddii aadan ogolaan adeegsga caymiskaaga gaar ahaaneed ama ka ilmaha oo qayb ka ah sheegashada Medicaid, waaxdu iyo adeeg-bixiyaha Early ACCESS ma soo gudbinayaan dalab lacag celin oo raacsan Medicaid.
- Haddii aad ogolaansho u bixin waydid hawlgalinta caymiskaaga gaar ahaaneed ama ka ilmahaaga ee ka midka ah sheegashada Medicaid, waxaa laanta waajib ku ah in ay bixisaa ama sii waddaa adeegyada Early ACCESS ee ilmaha iyo qoyska IFSP kuwaas ood horey ogolaanshahooda u bixisay.

**LIFAAQ (B)**
**ADEEGSIGA MEDICAID: QODOBADA IN ADEEGGU BILAASH YAHAY**

**281—120.520(34CFR303)waa nidaamyada la xidhiidha hawlgalinta kaalmooyinka ama caymiska dadeyne si loo bixiyo qaraamaha adeegyada Early ACCESS.**

**120.520(1)** *Hawlgalinta kaalmooyinka iyo caymiska dadweyne si loo bixiyo qaraamaadka adeegyada Early ACCESS.*

****

*b.* Marka aan eegno hawlgalinta gobolka ee kaalmooyinka ama caymiska dadweyne ee ilmaha ama waalidka si loo bixiyo qaraamaha qaybta C ee adeegyada, gobolku:

(1) Ma codsan doono in aad isu diiwaan galisid kaalmooyinka dadweyne ama barnaamajyada caymiska ayada oon markaa shardi loogaga dhigayn helitaanka qeybta C ee adeegyada, waana in la haystaa ogolaanshaha hawlgalinta kaalmooyinka dadweyne ama caymiska, ama caymiska ilmahaaga ama kaalmooyinka dadweyne ee ilmahaaga, haddii ilmahaagu uusan adeegyadaas u diiwaan gashanayn;

(2) Waa in la helaa ogolaansho waafaqsan qodobka sharciga ee 281—120.7(34CFR303) iyo qodobka kale ee hoos yimaadda 120.420(1) si loo hawlgaliyo kaalmooyinka dadweyne ama caymiska dadweyne ee ilmaha ama waalidka si markaa loo bixiyo qaraamaha Qeybta C ee adeegyada, taasina waa haddii isticmaalkaasi:

1. Uu yaraynayo mudada caymiska ama uu yaraynayo mudada kaalmada caymisan ee waalidka ama ilmaha ee barnaamijkan hoos imaata;
2. Ugu dambayntii ka dhigaya waalidka mid iska bixin kara adeegyadan uu ku helayo kaalmyooinka dadweyne ama barnaamijyada caymiska;
3. Uu sababayo in joogtada uu bixiyo la kordhiyo ama la joojiyo kaalmooyinka dadweyne ama caymiska ee waalidka ama ilmihiisa la siiyo;ama
4. Uu khatar galin karo uqalmidaadda waalidka iyo ta ilmaha ee helitaanka xuquuq guri iyo mid bulsho ee ku dhisan qaraamaha caafimaadka.

(3) Haddii waalidku uusan ogolaansho bixin sida waafaqsan faqradda 120.520(1)”b”, waxaa waajib ku ah gobolka in uu u billaabaa ama sii wadaa qeybta C ee adeegyada kusaabsan Qorshaha Ilmaha Qoyska (IFSP) kuwaas oo walidku ogolaanshahooda hor u bixiyey.

****

## LIFAAQA(C)
## QODOBADA “BIXIYAHA UGU DAMBEEY”

**281—120.510(34CFR303) BIXIYAHA UGU DAMBEEYA.**

**120.510(1)** In ay tahay sida ku xusan qodob hoosaadka 120.510(2) mooyaane, sharcigan looma adeegsan karo in la bixiyo qaraamaha adeegyo ilo kale laga bixin lahaa ama ha ahaadeen kuwo dowladeed ama kuwo gaar ahaaneed oy ka midyihiin barnaamajyada caafimaadka ee wasaarada difaaca, laakiin waxaa kali ah oo loo adeegsan karaa qodobkan fulinta qeybta C ee sharcigaas. Sidaa darted, sharcigan waxaa kali ah oo loo adeegsan karaa adeegyada wax-hor uga qabadka dhallaanka yar yar ay ee curyaanka ah ay u baahanyihiin, waana kuwa aan wali u qalmin in ay federaalka ama gobolka ama dowlad hoose ama ilo kale oo gaar ahaaneed ka helaan adeeg (ayada oo la raacayo qodobada 281—120.520(34CFR303) iyo 281—120.521(34CFR303).

**120.510(2)** *lacag bixinta ku meel gaadhka ah-lacag celinta.* Haddii loo baahdo in wax laga qabto dib u dhaca ama qaab xumi ku timaadda bixinta adeegyada horey wax uga qabashada ee la siiyo ilmaha ama qoyska ilmaha, waxaa la adeegsan karaa lacagaha qeybta C ee hoos yimaadda sharciga si loo siiyo bixiyaha adeegyada (waa adeegyada iyo hawlaha hoos yimaadda sharcigan waxaana ka mid ah adeegyada caafimaad sida ku qeexan qodobka 281 120.16(34CFR303)(mana ku jiraan adeegyada daawooyinka); waxaana ka mid ah hawlaha adeeg raadinta ilmaha ee ku xusan qodobada 281—120.115(34CFR303) lana marayo281—120.117(34CFR303) iyo qodobada 281—120.301(34CFR303) lana marayo 281 120.320(34CFR303), iyo qiimaynta sida ku qoran qodobka 120.321 (34CFR303), waxaana kale oo lagu dabaraa hawlaha marka laanta ama cidda ugudambaynta mas’uulka ka ah lacag celinta ay la dib dhacdo bixinta lacagta.

**120.510(3)** *In aan la dhimin kaalmooyinka.* Ma jirto wax sharcigan lagu fasiran karo oo u saamaxaya gobolku in uu dhimo kaalmooyinka daawo ama kaalmooyinka kale ee gobolka ama in uu uqalmidda uu badalo asaga oo raacaya Cinwaanka V ee Sharciga Social Security Act, 42, U.S.C 701 et seq (SSA) (ee la xidhiidha caafimaad hooyada iyo ilmaha) ama asaga oo adeegsanaya cinwaanka XIX ee SSA 42 U.S.C 1396 (ee la xidhiidha Medicaid), waxaana ka mid ah qaybta 1903(a) ee SSA ee la xidhiidha kaalmada daawo ee la siiyo dhallaanka curyaanka ah marka adeegyadaas uu ka mid yahay Qorshaha ilmaha iyo Qoyska (IFSP) oo loo qaatay sida qaybta C ee sharciga.